

SAGAL IYO SAKARIYE
QISADII (SAGAL IYO SAKARIYE)
WAA QISO NOOCYO BADAN. AHNA QISO KU BARAYSA WAAYAHA
NOLOSHA IYO IN LABADA RUUX EE IS JECELI AYSAN AHAYN
LABO IS JECEL OO KELIYEE BALSE AY YIHIIN NAFTA ISKU HURAYAAL


BUUGANI WUXU TAABANAYAA
QISO XAQIIQI AH OO KA DHACDAY
DALKEENA HOOYO WAXANA
QORAAL AHAAN U BEDELAY
- MOHAMMAD GURAY FAARAH QUULE
Fiiro Gaar ah
Labadan ruux magacyadooda saxda ah mahan Sagal iyo Sakariye. Ee annaga ayaa u qaadanay magacyo kale maadaama ay diidanaayeen in kuwooda saxda ah la sheego ama markaa laysticmaalo sidaa laa jigeed magacyada saxda ah kuwa Buuga ku qoran maahan.
Mar iyana Sagal Dhankeeda la waydiiyey Su'aasha ah Jacayl maxad ku qeexi lahayd waxay tidhi:
Jacayl waa lalabo ama wareer aad ka lumayso jahada aad u socoto
Waana doon uu Dakharkii ka jabay oo marba badwaynta dhan kuula ciyaaraysa
Sidoo kale waa saxan soxo aad u udgoon lakin xanuun badani ka danbeeyo
Waa farxad iyo dhaawac isku jira waa ilmo iyo qosol
Waa cadho iyo cilmi la'aan waa dhibaato iyo dheef
Waa dhimasho iyo nolol
SAGAL IYO SAKARIYE

# SAGAL IYO SAKARIYE

## HORDHAC

Sheekadan waa sheeko ku saabsan Jacaylkii iyo dhibaatadii Sagal iyo Sakariye ay soo wada mareen. Sheekadan waxad ku baran doontaan nolosha aadmigu inay tahay ta waxa qalbigeedu raaco ama ay Jeclaato aan hore uga samrin ilaa iyo inta ay ka helayso ama ay si xun u waayeyso godba ha ahhaatee. Wallow taasina ay billu-aadmigu ku kala duwan yihiin oo qolloba si u aragto ama u jeedo.

Sagal iyo Sakariye waa labo dhalin yaro ah noloshana markaa aan wax badani uga billownayn marka laga reebo inay yihiin dad xaga aqoonta meel fiican ka gaadhay oo waxa san iyo waxa xunba kala yaqaan sidoo kale waa laba qof oo midba mid ka kale uu aad u jecel yahay waana labo qof oo xeesha jacaylkoodu yahay mid ugub ah oo ku cusub dhamaan bulshada markaa labadooda aqoonta fiican u lahaa waxay ugu yeedhaan **Jacaylkii ugubka ahhaa**. Waa laba dhalin yaro ah oo marka laga reebo xaga tamarta dhaqaalaha waa labo qof oo dad la dhaqan leh sidoo kalena wax fahanka nolosha aad moodo inay yihiin in iyaga loogu tala galay sidoo kale waa laba qof oo wadka caashaqa aaminsan.

Dadka falanqeeya sheekooyinka Jacaylka waxay ku tilaamaan inay la xanuun tahay sheekadii Cilmi Boodheri iyo Hodan, wallow toodu ka yara wacan tahay oo marka danbe labadoodii

is calfadeen hadana waxa la oran karaa waa laba isna helay una samray waayaha uu mariyey caashaqu. waxana ay ku sababeeyaan xanuunka wiilka helay iyo callaacalka faraha badan ee uu marba la diryaamayo sidoo kale mar aan wax ka weydiiney dadka jacaylada odorosa waxa ay yidhaahdeen anagu waxan oran lahayn qisadan Sagal iyo Sakariye waa Qiso cimro qaadasho mudan waayo dadka dhalin yarada ah maanta oo kale qofka ku dhaha waan ku jecelahay waxay moodaan inuu iska leeyahay ama markaa uu kaftan ka wado.

Iyaga oo aan markaa ka taxaderayna waxay ku dhaqaaqaan fal markaa aan ka farxinayn kii wax jecelaaday oo waxay ku riddaysaa qofka wax jecel meel khatar ah siiba marka laga hadlayo raga dhalin yarada ah ee haatan jooga waxay moodaan in Hableheenu yihiin wax aan jacaylka wax ka aqoon hadii ay ku tiraahdana waan ku jecelahay waxay sameeyaan wax markaa aan inanta raali gelinayn isaga oo markaa baahiyihiisa gaarka ah kaga faa'idaysanaya ayuu wixii isagu uu doonayo ku dhahaa haba ahhaatee wax aan iyada u cuntamayn ama u qalmaynbee. Sidoo kale Hablaha wiilasha waxba kama habeen sokeeyaan wallow aysan sida wiilsha iyagu aysan u tiro badnayn hadana waa lasoo helayaa Gabdho sidaa iyaguna uga faa'idaysta wiillasha jacayl kooda u soo badhiga ama markaaba kala hadla xaaladaha jacaylkooda, inta bandanna habluhu waxay isku dayaan inay wiillasha xaga dhaqaalaha ka eegaan oo markaa hadii uu yahay mid ladan oo illahay wax u dhiibay

waxay isku dayeen inta uu ladan yahay inay la laacdamaan maalinta uu wax waayana inay ka jaqaafiyaan iyaga oo markaa cududaaro aan Meesha ool ama u qalmayn soo bandhigaya.

Waxan kusoo kuubi lahaa hadii aad tahay la jecelaade wiil ahow ama inan ahow daryeel ruuxa kuu dareen sheegtay oo ha noqon qof ku fekera waxa qofka kale dhaawac iyo hagar daamo u geysanaya.

Kaasi wuxu ahhaa dadka jacaylada falanqeeya mid ka mid ah.

Hadaba sidii aan idiin soo wada sheegay sheekadan mahan mid dhaawacyari gaadhay labada ruux ee is jecel lakin waxay ahayd mid meel fog gaadhsiisay isku hilaw-gooda iyo isku soo xiisidooda marka dhawr dhan laga eego waxad sidoo kale mar marka qaar ku arki doontaan wax aad is dhahdaan malahan waxani waaba ka bad badis oo mahan wax suuro gal ah hadana marka aad si wacan ugu sii fiirsato waxad is oran allah yaa kuu geeya aad la xalisid arintaa labadooda haysatee.

Ogowna hadii dadka la oranlahaa ama adigagaan lagugu oran lahaa Jacaylka qeex mahan wax aad afka keliya ku qeexi karto ee waa wax qalbiga oo keliya laga qeexi karo sidoo kale jacayl macnihiisu mahan marka aan isku baahano is helno ee waxa loo maraa shaqo adag iyo wakhti adag sidoo kalena waxa uu rabaa dhabar adayg iyo noloshadaa badhkeed ama gebi ahaanteedba inaad u hurto sida **Sakariye** oo kale.

# SAGAL IYO SAKARIYE

*Mar hadaba Sakariye la waydiiyey Su'aasha ah Jacayl maxad ku qeexi lahayd ayuu yidhi:*

- ✓ Jacayl waa Nabar aadan ogayn marka uu ku qabanayo, waana dhaawac aan qof kasta kula dareemikarin.
- ✓ Xanuunka Jacaylka qof uu ku dhacay mooyaane qof kale eray qudha kuma cabiri karo.
- ✓ Hadiise lay odhan lahaa jacayl daawo haloo sameeyo waan diidi lahaa waayo wuxu dadka baraa micnaha ay noloshu leedahay marka aad haysato ama aad ogtahay qofka aad jeceshahay.

Halkaa waxad ka dareemaysaa inay labadoodu kala fugayn marka aad eegto qaabka ay wax u cabirayaan ama ay u tilmaamayaan waxa uu jacaylku yahay.

## MAHAD NAQ

Waxan halkan mahad guud iyo mid gaar ahaaneedba marka hore u marinayaa Alle Wayne, marka xigtana waxan halkan uga mad naqayaa Marwadayda **Muntaz Muse Abokor** oo igu dheeri gelisay inaan sheekaday dhamaystiro dadkana la wadaago iyada oo markaa wakhti igula bixisay in aan qoro oo aan ka dhigo buug dadku ka faa'idaystaan waxna ka bartaan qisooyinka Somalida dhexdeeda ku duugan.

# SAGAL IYO SAKARIYE

Waxa mahadda xitana u sugnaatay Saaxiibkay ahna walaalkay **Foosi Ciise Yuusuf** oo inta qofi wakhti bixiyo, ku bixiyey in uu sheekada marka hore akhriyo isla markaana uu dib u eegis ku sameeyo erayada khalad qormay ama markaa is dhaafay si aan dadku ugu wareerin *(runtii waxa uu ii iftiimiyey meelihii ugu badnee ee aan markaa khalad qoray ama qorida eraygu iska kay raaceen).*

Sidoo kale waxan u mahad naqayaa Saaxiibkay marna walalkay **Amin Abdi Mohamed** oo runtii qayba ugu way ee buuga igala qayb qaatay isaga oo fikiro aad u fara badan ugu biiriyey sida aan markaa u soo bandhigilahaa iyo qaabka daabacaadiisu u eekaan lahayd.

Waxan sidoo kale mahad u gudbinayaa Saaxiibkay ama Wiilka aan Aderka u ahay **Ali Abdi Faarah** iyo Marwadiisa **Sahra Faarah Abdirahman** oo ah iyana sidoo kale walshay ama garab aad iigu qaali ah iyaga oo aad iiga caawiyey sixitaanka qoraalka iyo dib u geesta buuga iyo indho indhaynta khaladaadka iga dhacay markii aan buuga qorayey. Sidoo kalena waa labada ruux ee aabe iyo hooyo u ah afkaaraha iyo gogol dhiga Buuga. Sidoo kalena garab iga siisay meelaha ugu mihiimsan ee laga daabici karo buuga.

Waxan kaloo u mahad celinayaa dhamaan dadka ila wadaagay fekerkooda iyo weliba markii ay akhristeen sidii ay u arkayeen

buuga iyo wixii markaa ka cajebiyey aad baan bar labaad iyo mar sadexaadba uga mahad celinayaa Aragtidooda tolmoon.

## AFEEF

Waxan ka afeefanayaa wixii khaladaad ah iyo in hadii aan wax khalday xaga erayada in aan ahay billi aaadmi oo Allah uun baan khaldamin wixii sixitaan ahna waa aan qaadanayaa sidoo kale waxan ka efeefanayaa hadii hadalada qayb aan si xun usoo gudbiyey in aanan ula jeedin wax markaa khalad ah lakin laga yaabo in aad adigu sidaa u aragto waxanse diyaar u ahay xili allaale iyo xiligii aad illa soo wadaagto in aan kaa jaahil saaro khaladkaa ama markaa waxa aan ulla jeeday. Makhaldame waa illahaye Horaa waxa luugu maahmaahay **(ama afeef hore yeelo ama Adkaysi danbe yeelo)** markaa taasi anniga waa iga afeef**.**

## BILLOWGII IS BARASHADA SAGAL IYO SAKARIYE

Sheekadani waxay ka dhacday magaalo ku taala Dhanka galbeed ee Sool. Waxa aad iskaga helay wiil dhalin yaro ah iyo inan deris ahaa wallow aan reerku xigaal ahayn oo labo aano kala dhextaalona ahaayeen waxa ay hadana iyada oo ay sidaa tahay labadan qofi isku qabeen dareen aad cajaa'ib u ah.

Sakariye waa wiil ka soo jeeda reer danyar ah oo aan markaa dhaqaale buuran haysan lakin iska ladan oo nolol maal mood

kooda hella sida ay Somalidu u badan tahay. Waana inan dhalin yaro ah oo ay bulshada si wacan isku fahmaan, siiba markaa dhalin yarada ay isku lodka yihiin.

Sagal waa inan aad u qurux badan muuqeedana lagu qiyaasi karo sida Sagal subaxdii marka waagu soo casaado qoraxduna aanay aad usoo wada bixin cirkuna aanu lahayn Daruuro badan oo markaa Sagalku qarinayo, iyo dhir aad u dhaadheer oo waaqda Shinbiraha kala duwan codkooda mooyaane aan cod kale wehelinayn. Inanta sidaa oo dhan u qurux badan hadana waxa u sii weheliya Dabeecad aad moodo in iyada keligeed loogu tala galay oo aan ruux kale la wadaagin. Sidoo kale waa qof intuu wax bartay hadana wax kasta ku go aaminaya Caqliyada illahay ugu deeqay iyo weliba Falsafada tiraahda (**Qurux Aftahaniyo kuu raacday waa guushii oo iska cad**). Sagal intaa waxa u dheer waxay kasoo jeedaa reer hodan ah oo illahay wax siiyey haday noqoto dhaqale iyo hantiba.

Hadaba aan idinku jalbeebiyo sheekadan sida ay ku bilaabatay iyo sida ay ku dhamaataye ee sii akhri sheekada.

Waxa Inanta dabeecad u ahayd in wakhtiyada ay firaaqada tahay inay aaddo dooxada oo kayara baxsan magaalada si ay intay jawiga usoo bedelato waxna meesha ugu soo akhrisato isla markaana ay Hawl maalmeed keeda qayb ka mid ah ay kusoo qabsato dooxada. Mar marka qaar waxa ay raaci jirtay wiil walaalkeed ah oo kor uga waynaa lakin dadka aan hadalka

badan ahayn degan oo sida iyada aad u dulqad badan. Sakariye waa wiilka sheekadeenu ku socotee wuxu aad u jecelaa xaga kubada xagta wuxu isna galbihii usoo dhaadhici jiray xagaa iyo garoonka kubada cagta isaga iyo saaxiibadii si ay markaa ugu soo maa weeloodaan kubada cagta. Ogowna Garonka iyo dooxadu waxay ku yaaliin isku Jaho ama isku dariiq baa loo maraa waxana soo sokeeya garoonka oo marka hore qofka dooxada u socdaa wuxu ku khasban yahay in uu maro wadada Garoonka. Kedibna wuxu u sii gudbayaa xagaa iyo dooxada ee ay inantu ku soo nefisto keligeedna inta badan mahane waxay israacacaan Hablo ay markaa isku wax barasho yihiin oo ay inta badan wax wada Akhristaan kana dhaxayso saaxiibtinimo. Sakariyena waxa uu inta badan ku soo horayn jiray Garoonka isaga oo meherad u dhow wadada ay u maraan Garoon kasii Cabi jiray shah Casariye ah.

Galabtii danbe isaga oo ka soo baxay meheradii oo markaa cagta soo saaray wadadii garoonka ayaa waxa uu arkay gaadhi sii dhaafaya oo u socda xagaa iyo garoonka waxanuna sii qoraan saday gaadhiga wuxuuna arkay Dareewalka iyo dumarka saaran gaadhiga. intaa markii uu jaleecay ayaa waxa xaga hore ee gaadhiga ka soo jaleecay inantii Sagal oo aad moodo in Nuur meel mugdi ah lagu daaray isla markaana arladii u dhowayd oo dhan wada ifiyey. Wuu u qaadan waayey in qofka gaadhi kasoo eegay ruux dhab ah ahaa iyo in uu wax uu isagu suuraystay ay ahayd intaa markii uu is wediiyey ayaa

gaadhigii iyo inantii ka libdheen lakin su'aasha uu aad isku weydiiyey ayaa ahayd niyo yaa kula xaqiijiya waxa ad aragtay in ay inan ahayd iyo in ay indhahaaga ahayd wiilkii waa iska soo baxay isaga oo naftiisa is khilaafaya oo marba wixii uu arkay beeninaya kana soo qaadaya in uusan qof caadi ah arkine uu keliya isaga qalbiguusu wax iska suuraysanayaan.

Waxa uu soo gaadhay Garoonkii iyo saaxiibaddiisii isaga oo uga war bixinaya waxa uu soo arkay iyo sida uu u fekerayo mudo dheer markii uu muran dheeri dhex maray ayaa waxa ay go'aansadeen inay berri wada yimaadeen meherada oo la eegaan qofka uu ka sheekaynayo. Maalintii xigtay waxa isisoo raacay dhamaan asxaabtiisii uu la wadaagay sida wax ay u jiraan. Nasiib daro maalintaa maysan arkin inantii lakin waxa aad moodaa inay dadka qaar aanay aaminin marka laga reebo Ilyas oo ay aad iskugu dhowaayeen maalintii danbena Ilyas ayaa soo raacay hadana waa waayeen.

Mudo markii ay kasoo wareegtay ayaa dhulkii waxa maansheeyey roob ma hiigaan ah oo aad u dhibco badan taasi waxa ay sababtay in dhamaan meelihii dhalintu kubada ku ciyaari jirtay ay wada buuxsamaan ama ay wada dhiiqo noqdaan sidaa awgeed mudo lama soo aadin kubadii iyo meelihii lagu kulmi jiray waxase iska soo baxay maalin maalmaha ka mid ah Sakariye oo doonaya in uu iska soo jimicsado oo melahaa soo mar maro wuxuu wadadii soo hayaba waxa uu afka soo saaray xagaa iyo dooxadii ay ku jawi bedelan

jiraan Sagal iyo Saaxiibadeed. Waa iska soo lugeeyey si dhib la'aan ah wuxuuna aakhirkii soo cago dhigtay halkii ay jogtay inantii Sagal ahayd. Halmar ayuu waxa uu jaleecay Hablo soo fadhiya meel aad u qurux badan oo biyaha Toguna qul qulayaan Raha waaq diisuna ay is gaadhay wuu kusoo yara dhowaaday mise waa hablo dhalin yaro ah oo iska sheegaysanaya waxna iska akhrisanaya. Waxa uu is weydiiyey oo niyo Hablahan maad cabaar iskala joogtid oo aad iskala xaraabaysatid waa soo socday markii uu dhawr talaabo u soo jiray ayaa waxa cajebisay inan sii jeeday codkeeda isla markaana waxa uu ka helay codkan aadka u degan ee ka soo baxaya inanta afkeeda waxa uu la sii raacay dhegta isaga oo markaa macaansanaya qaabka ay inantu u hadlayso lakin weli muusan arkin wejigeeda oo waa ay ka sii jeedaa. Wuu soo socdaba aakhirkii waxa uu soo gaadhay hablihii waana uu bariidiyey is bariidin ka bacdi waxa uu waydiiyey waxa ay meesha ka qabanayaan waxana markaa u jawaabtay Sagal saa xiibteed uu ku tiri niyohow miyaadan arkayn in aan wax iska akhrisanayno oo aanan doonayn wax na mashquliya markaa ayuu qoslay. Inantii Sagal ahayd waxa cajebiyey Qosolka Sakariye waxa ayna jaleecday dib si ay u ragto wiilkan qoslaya. Mise Sakariye ayaa waxa uu garowsaday isla markiiba inantani inay tahay inantii uu raadinayey waxana ka soo bixi waayey wax hadal ah oo waxa uu noqday afkliiba juuqda gabay.

*Wuxuuna markiiba soo Xasuustay Heestii ahayd*

# SAGAL IYO SAKARIYE

*Heesta Cajebey cajiibeey ee uu qaaday Maxamed Saleebaan Tubeec*

- **Cajebey cajiibeey**
- **Cawo iyo ayaaneey**
- **Caqligaad xadaysaa**
- **sida geed cal iyo buur**
- **Carro-hodan ku yaalloo**
- **Cokanoo irmaanoo**
- **Dhirta kale ka caynoo**
- **Hoobaan casuus lihi**
- **Laamaha is-celisoo**
- **Ubaxuna tin iyo cidhib**
- **Kaga dhigay cabbaadhyiyo**
- **Dusha sare caleentii**
- **Cidhifka is la gaadhaan**

Markii uu heesta halkaa marinayey oo uusan weli dhamayn ayaa waxa ku qaylisay Sagal Saaxiibteed kuna tidhi war maad hadashid dee, wuxuuna ugu jawaabay heestii oo uu markaa ku celiyey isaga oo ula danlahaa Sagal si uu u dareensiiyo quruxdeeda iyo sida ay markaa u cajebisay isaga.

Sagalna heestii bay si wacan ula dhacday iyada oo markaa dhoola cadayn ugu jawaabtay kuna tidhi alla walle mahad sanid kun jeer.

# SAGAL IYO SAKARIYE

Sagal dhankeeda Sakariye waa ka heshay wuuna cajebiyey haday noqoto dhoola cadayntiisa, habdhaqankiisa iyo muuqiisaba maadaaba uu ahaa nin laba lafood ah sidoo kale qurux u dhashay. Si aayara ayey waxa ay ku tidhi wallal soo dhowow anagi wax baan iska akhrisanayney malaha waxaba laga yaabaa in aan wax kala faa'idnee. Sakariye waxa aad ugu adkaatay Jawaabtii oo waxad moodaa wiilka in maanso qabsatay waxayna kaga soo hadhay Dhaygag uun Sagal ayaa waxa ay dareentay in wiilka wax ka yara khaldemeen markaa ayey waxay cod hoose ku tidhi wallaal soo fadhiiso oo inoo kala faa iddi'ee, waa yahay ayuu kugu jawaabay waana soo fadhiistay meel aan aad uga fogayn Sagal waxana lays waydaarsaday Magacyadii uu midba mid ka kale u sheegay ma gaciisii markii lakin Sagal lasoo gaadhay oo ay rabto inay magaceeda sheegto ayaa afkiisu waxa uu ka xaday walley marka aan si wacan kuu eegay waxan xasuustay saaka markiii aan kalahada ahaa ee aan salada subax soo tukaday dhinacaygaa ayaa waxa iga qabatay muuquu quruxda badnee ee Sagalka markaa ayaan hada waxa niyada igaga soo dhacday sowkan sagalkii aad saaka arkaysayba. Intay wada qosleen iyada iyo Saxiibadeed ayaa waxa ay dhahday wallaal waad igu ciyaaraysaaye hore ayaad u taqaanay magacayga. Ee waxay ii sheegtaa meesha aad magacayga ku taqaanay ama aad ku baratay. Markaa ayuu ku yidhi waxa aan kuu cadaynayaa in an muuqaaga qiyaasaye e aanan weligay maqal magacaaga haa waan maqlay lakin waxan ka wadaa in aanan

kuu aqoon in magacan aad leedahay ama laguugu yeedho. Waayahay ayey tidhi ka gudub illahay baa kuu saxaye haa waa sidaa illahay ayaa iisaxay wallaalo. Haye maxad ku haysaan meesha oo aad ku akhrisanaysaan ayuu waydiiyey isla intii aanay u jawaabin ayaa waxa u jawaabay saaxiibadeed oo ku tidhi wallaw wax baan rabnaa in aan qaybnee nagadaa mashquulka aad noola timid mida kale horta wiilashiina anigu maba jecli oo meesha aad inan ku argtaan waad isisoo tubtaan marka wallaal naga raali noqo oo nadaa si aan wax u akhrisano. Aftahan nimo isma qarisee waxa uu ugu jawaabay kawarama hadii aan idinka caawiyo qaabka aad wax u qaybaysaan oo aan qaab wada hadal ah wax u qaybtaan inantii Sagal ayaa tidhi oo side ka wadaa wuxu yidhi waxa aad qaybaysaan ayaan waxan kaga sheekaynaynaa luuqadeena markaa uma baahnid inaad wax akhridaane waxa aad u bahan tihiin wixii in aad aniga ii sharaxdaan hadii aad intaa samaysaan waxan idinka balan qadayaa in aydaan weligiin ilaawin waxa aad ii sharaxdeen. Way yaabeen oo waxay ka yaabeen kalsoonida uu hadalka u leyahay. Waa laysku af gartay waana laysku waa faqay in sidaa la sameeyo. Intaa markii lawada sameeyey ayaa waxa soo hoomiyey wiilkii walaalkeed oo doonaya in uu xaafada hada u qaado. Sagal saaxiibteed ayaa soo booday oo tidhi allah naa waa wlaalkaa ee inaga kici meesha yaanu hada qayline. Sakariye ayaa waydiiyey inay Sagal wax telefan ah sidato ama ay siin karto meel uu kala xidhiidho waxana ay tidhi wallaal maalmahan bilaa Telefon

baan ahay lakin waxad igala soo xidhiidhi kartaa kan inanta Saaxiibaday. Telefankii ayaa laysku qoray waxana laysku af gartay in beridanbe halkan lagu kulmidoono oo aysan beri imaan doonin halkan. Waxa uu ugu jawaabay wayahay wallaalo lakin mid baa bid keentee hadii aan tefanka Saaxiibadaa hayo mar danbe igama lumi doontid ee taa ogow.

Waa ay dhoola cadaysay iyo ayada oo qosol dibnuhu iyo ilakaha qaarkooda sare aad moodid in aan lakala fogayn ayey qososhay oo tiri waayahay wallaal.

Halkii layskaga soo kala teg waxana madoobaatay arladii oo dhan oo waxa ku kala tegay halkaa maalintii iyo Qoraxdii sidoo kalena Sakariye iyo Sagal baa is macasalaameeyey mudo waxa ay cadceedu sii maqnaataba waxa uu go'aansaday in uu hadaba Waco bal saaxiibadeed waxa ay ku nabad galeen iyo in uu dhoho ma kuu dhawdahay Sagal. Inantii Sagal saaxiibadeed ayaa waxa ay ka qabatay Telefankii waxayna ugu jawaabtay wallaal ma wada joogno ee waxad samaysaa beri subax soo wac marka aan aadno Wax barashada ayaan kulmi doonaa hadii alle dhehee waayahay ayuu kaga tegay. Sakariye wakhtigii baa wuxu la noqday in aan waaguba beryeyn waa seexdaa waa soo toosaa mise weli waa saq-dhexe wuu ku noqdaa hurdada se ma nin Dareen jacayl hayaa seexanaya oo hurdo indhihiisa ku soo dhacayaan waxa arkay oo lasocday wallaalkii ka yar oo qolka qayb ka hurda wuxuuna yiri waa

caado somaliyede niyohow maad naga sexatid aan kaa seexanee ama naga dul dhaqaaqdid. Markaa ayuu yidhi Wallaal iga raali noqo oo iska seexo waan kaa dayn taaha iyo dareen jiidadka Sagale.

waagii markii uu baryey isaga waagu waxa uu la noqday nin lagu yidhi sanadka danbe ayeynu kulmaynaa oo waxaba uu aad u raagsaneyey wakhtiga salaadiii subax ka bacdi ayuu waxa uu wacay inantii isaga oo waydiinaya waxa ay ku soo tooseen waxayna ugu jawaabtay wallaal miyaad waalan tahay hadaaba waagu baryee side ayaan u ogaan karaa waxa ay ku soo toostay mida kale anigu ma caalimu qayb ayaan ahay marka ay ii timaado ayaan ku soo wici ee naga war hay markaa. Waayey ayuu yidhi lakin wallalo isoo wac marka ay sidaa kuugu timaado waxadna iga gaadhsiisaa oo aad ku dhahdaa:

- **Saxan-soxo udgoon baad tahaye Sagaleey ii kaalay**
- **Sedka laabta tii iga tegtaay adigu ii kaaalay**
- **Sanadahan midii aan rabaay adigu ii kaalay**
- **Sayid kii jacaylkaan ahaye adigu ii kaalay**

Halkaa markii uu marinayey ayey waxa ay ku tidhi war heedhe anigu ku af garan maayee iyada wixii aad ku oran lahayd adigu ku dheh oo marka ay ii timaado la hadal mida kale anigu ma waxad mooday waxan in aan xifdin karo aduunkaba calaacal baan u necebahaye waa inoo iyo hadhow marka ay ii timaado. Kedibna waa ku damisay Telefan kii markaa ayuu niyada ka yiri

hadii ay i ogaan lahayd wixii xalay igu dhacay ma sidaa ayey iigu damin lahayd. Allah war moog illahow ha cadaabin.
Dhanka kale Sagal ilaa iyo markii ay wiilka is barteen waxa ay ku jirtaa xaalad farxadeed oo qofkii arkaba waxa ay ku salaamaysaa farxad iyo weji furan xitaa wiilka xaafada ugu yar oo dhib low ah oo ay intaa is haystaan saaka waxa ay ku salantay farxad iyo qosol. Isaga oo la yaaban ayuu waxa uu hooyadii ku yidhi hooyo tani saaka maxay la faraxsan tahay oo ay soo cuntay. Markaa ayey tidhi waryaa iska daa walaashaa kaa wayn oo ixtiraam walaashaa.
Xoogaa ka bacdi waxa ay ka soo baxday gurigii oo ay soo aaday wax barashadii iyada oo soo martay saaxiibadeed kuna tidhi naa heedhe wiilkii shalay baa isoo wacay xalay iyo saakaba isaga oo wax ka sheekaynayee bal lahadal oo warayso.
Waa kusoo celisay waxayna ku tidhi wallalo waa sagale iiwaran saaka maxaad ku waabariisatay intaa markii uu maqlay isga oo aad moodo geel mudo badan ugaybkii laga xereeyey ayuu wuxu yidhi allah codkaaga marka aan maqlo waxan mooday in aan meel aad ii oomanayd aad inaad ii qaboojisay quruxeey.
Markaa ayey ugu jawaabtay wallaal malaha kula mid baan ahaye warkaaga isii markaa ayuu yidhi hadii aan kuu waramo armada i fahmi weydaa oo aad ila socon kari weydaa markaa ayey ku tidhi illama ahhan qof ku fahmi kari waayeysa in aan ahaye adigu ii sheeg iina war bixi. Markaa ayuu sidan yidhi

# SAGAL IYO SAKARIYE

- **Saqda dhexe miyaan selelay oo reemay**
- **Sanado badan sidii ruux maqnaa miyaan anigu kuu xiisay**
- **Sagaleey miyaan adi dartaa Gama'a aan diiday**
- **Seyidkii walaalkay miyii cadho is googaynin**
- **Sidii aar libaax oo laftaa dhabarku ay jiifto**
- **Sagaleey miyaan addi dartaa guuxa jari waayey**
- **Saacadaha habeen kii miyaan tirro ku soo koobay**
- **Sidii nirig yar oo hooyadeed duurka ku hawlawday**
- **Sagaleey miyaan addi dartaa Ololka dayn waayin**

markaa ayey waxay ku tidhi wallaal meel san baad wax u wadaaye ogow hadii aanan maanso ama tix wax ku cabirin Karin macneheedu mahan in aanan kula mid ahayn ee rabi haysku keen dhaafo. Intaa markii ay tidhi ayuu ugu jawaabay hadii halkii aan ka baqayeyba Nabarku soo dhaaf illahaybaana mahad daasi u sugan tahay goorma ayeynu is arkaynaa ayuu u celiyey waxana kugu jawaabtay **waxan is arkaynaa marka laba wada hadashaaba ay is fahmaan** ayey ku tidhi waxana uu fahmi waayey waxa ay hadalkaa ula jeedo wuuna ku ceshay kuma fahmin waxa ay ugu jawaabtay **Saacadaha is guraa marka ay labo noqdaan midana geeska istaagto**. Wiilkii isaga oo yaaban ayuu waxa uu ku ceshay wallaaleey armay ii wacnaan lahayd in aad hadalka iiga qaado daaha. Haye aydey ku tidhi waxayna ugu jawaabtay waa inoo iyo beri.

# SAGAL IYO SAKARIYE

Haye ayuu ku yidhi lakin isaga oo aad isku waydiinaya waxa ay inantu ku lahayd. Wiilkii waxa uu u kuur galay sidii uu u fahmi lahaa waxa ay inantu ku tidhi waxana uu garawsaday inay inantani tahay qof aftahanimo iyo aqoon isku darsatay sidoo kalena hadaladeedu wada sarbeeb yihiin wuxuna go'aan ku gaadhay in uu hadaladeedana u fiirsado kuwa hada ay ku tidhina uu uga jawaabo. Wax badan ayuu u fekeray labadii sadar hee dalka ahaa lakinse waa soo qaban waayey wuxuuna waydiiyey ragii saaxiibadii oo Ilyas ugu horeeyo waxayna ugu wada jawaabeen waxan anagu garan maynee orodoo dadka waa wayn warayso ee af somaliga u dhuun daloola. Markii uu arkay meesha xaaladu taagan tahay waxa uu gaadhay go'aan in uu aabihii weydiiyo waxana uu aaday aabihii wuxuna ka waraystay arintaa waxa lagu macnayn karo. Aabihii ayaa ku yidhi Aabe   hadii qofi kugu yiraahdo (**waxan is arkaynaa marka laba wada hadashaaba ay is fahmaan)** *waxa uu ula jeedaa waa marka wax Khilaaf dhalin karaaba uusan meesha ool sida in labo qof oo keliya wax ka wada hadlayaan ama wax laysku af gartay oo hore ay jiraan sida* ***meel/goob*** *ama* ***saacad/xili***. Markaa ayuu ku celiyey oo yidhi oo tana maxaa looga jeedaa (**Saacadaha is guraa marka ay labo noqdaan midana geeska istaagto**). Markaa ayuu odaygii ku yidhi aabe tani waa Cilmi iskuule garan maayee taas qofka ku yidhi kula laabo markaa ayuu wiilkii garwsaday in waxan lagu yidhi ay u baahan yihiin qof fahankiisu dheer yahay sidoo kalena xaga maadiga ku wacan lakin waa uu isku deyey in badan isaga oo la

kaashanaya weliba dad kala duwan lakin wax xal ah kamuusan gaadhin.
Waa iska tegay galabtii ayuu waxa uu wacay inantii waxayna u sheegtay inay duhuradii ka tagtay. Hadalkaa marka ay tidhi ayuu waxa uu gartay waxa ay inantii Sagal wiilka kula hayd inay ahayd xiliyada Saalada oo ah marka saaladaha labo tagto midana ay weli wax ka dhiman yihiin lakin ay aad u dhow dahay mac neheedu yahay salaada **casar** ayaan waxan ku tukanaynaa meeshii aan maalintii dhowayd isku aragnay. Waa uu qoslay weliba si kor ah isaga oo ilaaway in qof uu khadka ugu jiray markaa ayey inantii tidhi war maxaad ku qososhay markaa ayuu yidhi waxba lakin wax la qaab leh ayaa qalbiga igaga soo dhacay ee waa inoo iyo xeligii aan balanay. Wakhtigu wixii uu is guraba wiilkii waxa uu aaday galab nimadii meeshii wuxuuna la sheekaystay inantii Sagal ahayd isaga oo labadiina u sheegay walow ay aad ula yaabtay ninkaa caqligiisa weliba waxa ay ku tidhi war yaa kuu soo sheegay, oo aad soo waydiisay wixii aan ku waydiiyey ileen waa adigii i fahmi waayee isaguna kamaba laba labayne runtuu u sheegay wuxuuna ku yidhi midna Aabe ayaa ii sheegay tan salaadahana aniga ayaa gartay lakin xili danbe ayaan gartay. Waxa ay ku tidhi lakin su’aal aad u adag ayey ahay hadii aad xitaa garan waayi lahayd waxba kuuma dhinteen sababtoo ah adigaaba dhamays ah oo caqligaagu miisaaman yahay. Inta uu dhoola cadeeyey ayuu ugu jawaabay wax kasta oo ii kaa dhawaynaya waa wax waajib igu ah in aan garto ama aan soo dhoweeye.

# SAGAL IYO SAKARIYE

Mahad sanid ayey ugu jawaabtay markaa ayey waxa ay ku tidhi Sakariyow hada ma jacayl dhab ah ayaa aad ii qabtaa?
Waxa uu ugu jawaabay hadii aad qalbigayga aad soo dhugan karto waan kuu diri lahaa si aad u aragro dhamaan kuwa dhiiga iyo neefta naftayda ukala haba. Oo aad markaa aad waydiiso inta uu jacaylka aan kuu qaaday leeg yahay, lakin waxa hubaal ah inaanay taasi dhici karayn oo aanad samayn Karin waxanse isku deyeyaa inaan kuu qiyaaso dareenkaygu inta uu cabir leeg yahay. Waxan ahay ruux isaga oo wax kasta agyaaliin Baadiyo biyaba hadana Gaajiyo haraad la il go'ay oo waxa uu doonayaa labadaaba dhaafsiisan yihiin hadana aan garanayn qaabka uu wax u rabo lakin waxas waxa iga baahi tiri karaa waa adiga oo aan wixii kula wadaagi karo. Midna ogow Sagaleey Jacaylku mahan wax qofku inta uu samaysto hadana Xakamayn karo oo sida uu doonayo ka yeeli karo yacni aan iraahdo Jacayl baa i haya oo aan hadana marka aan rabo oran karo ima hayo, kaasi mahan Jacayl ee markii horeba waxa uu ahaa wax layska yidhi sidoo kale wax qofku iska dhoho iyo waxa dareen ahaan lookala dhahaana waa kala duwan yihiin. Lakin anigu tan aan hada taaganahay waa tii dhabta ahayd ama la'oran karo waa jacaylkii dhabta ahaa. Marka anigu Sagaleey aad baan kuu jecelahay hadii aad ila garab gashona waxan balan kaaga qaadayaa in inta noloshaada ka dhiman aanan weligay noqon doonin mid aad ka cabato ama aad diido hab dhaqankiisa taas maankaaga ugu bishaaree. Waxa ay ku jawaabtay mahad sanid Mudane. Intaa markii lays dhafsaday ayaa waxa soo booday

inanta saaxiibadeed oo tidhi wixiinu jacayl ka badane hada hawsheenii wax akhriska mayska guda galnaa ileen wakhtigu waa is gurayaaye waxay ugu jawaabeen si wada jir ah aduunkaaba oredee adiguna ma orod kalaad inoogu dartay. Waa layska qoslay labadoodii inantii waxa ay yara saluugtay wiilkan inanta sidaa ugu maran oo waxayba niyada gelisay kan farxad ayuuba sitaaye tollow adigu ma ka ridataa saaxiibadaa oo ma yara daba marisaa. Intaa markii ay niyada iska tidhi ayey tidhi allah naa miyad waalan tahay waa maxay waxan shaydaanku maskaxda kuu geliy oo intay shaydaanka kor u naartay bay tidhi war hawshiina iska wata anigu waaba idinka ag kacayaaye oo waxan aadi halka idinka soo horjeedee waayahay ayaa lays wada yidhi Halkii haasawe aad ulaba dhacayaa hayska sii socdo oo ha layska farxo wixii cabaar sidaa lagu jirayba waxa halmar soo bidhaamay oo meel fog ka soo muuqday wallalkeed oo doonaya in uu xaafadii u qaado oo markaa hawl yari kasoo korrodhay kedis bay ahayde ha tiraahdo allah waa walalkay ee orad yuusan ku arkine. Sida caadada ahna gabdhaha Somaliyed Walaalka ka wayn aad eyey u xishmeyaan hadii lawada qaan gaadho haka waynaato ama haka yaraatee waana dhaqanka quruxda badan ee soomalidu kala dhaxasho. Markaa ayuu yidhi waa caadi quruxeeye masoo dhewee aan iska sii yara fadhino maya maya ayey ugu jawaabtay waxayna u sheegtay wallalkeed inuu yahay nin aad macangeg u ah wax yaabahaana aan aad u jecelayn in uu walaashii ku arko marka iska tag oo waa inoo iyo caawa

annaana kusoo wici doona ayey tidhi waayey ayuu kaga dhaqaaday. Wiilkii wallaalkeed ahaana waxa uu meeshii ka kexeeyey labadii hablood. Waxa loo sheegay in lasoo doontay Gabadh eedadeeda oo markaa guriga joogtay. Dumarku hadalka marbuu ka fakadaaye waxa soo booday oo tidhi oo Sagalba waa ku xigtaaye oo ay qosol yar ku dartay. Sagal oo aad u cadhootay baa ku soo booday oo tidhi naa miyadan xishoonayn xagee aniga iiguurisay mida kale anigu qorshahaygu waa waxbarasho dhamaad keed aan meel ku ogaadee xagee ii wadaa. Markaa ayey tidhi mayee dee waa is ognahaye waxan is iri wallalkaa arinta la wadaag uun soo mahan. Wiilkii ayaa soo booday oo dhahay Sagal aniga ma wax baad iga qarin oo arin aad iga qarinayso ayaa jirta waxay ugu jawaabtay may wallaal ee waa iska kaftamaysaa inantu waa yahay ayuu ugu jawaabay mida kale yaanan maqal waxaa inta aad wax barashada ka dhamaynayso ayuu ku yidhi. Haye iyo hawraarsan ayey ku tidhi. Habeen nimadii ayey waxa ay wacday Sakariye oo ay halkaa sheeko aad u dheeri ku dhey martay. Waxa ay sidaa ku socotaba oo habeeniyo maalin lawada shekaystaba Sagalna ay telefan heshay. Ayaa wuxu waa magaalo yare waxa la ogaaday in labadani qofi ay aad isku jecel yihiin.

# SAGAL IYO SAKARIYE

## CADOWGII JACAYLKA IYO KHATARTII DHIMASHADA

Waxa magaaladii ka gees iyo ka geesba iskaga baxday sheekadoodii oo waxa lasoo wada ogaaday in labadan ruuxi ay aad isku jecel yihiin waxana sii dheerayd in aan labadooda cidina dhex geli Karin. Ku darsoo ha hilmaamine labada reerna Aano dil ayaa kala dhex Taal oo meel nabadi tolmoon tahay Mahan. Hadana iyada oo sida ah ayey jacayl kooda dayr adag u yeelen. Wiilkii Sakariye ahaa kubad iyo ciyaarihii uu aadka ugu laaloon jiran ama jecelaa waa iska wada dhaafay oo wuxu intaa hadal hayaa ama kafekerayaa waa Sagal. Dhanka Sagalna waa la mid wallow ay wax barashdii wado hadana Jacaylka hayaa waa mid aad u weyn oo waxa mar kasta la arkaa iyada oo aad moodo qof qalbigiisii meel ku maqan yahay oo aan markaa joogin waxana Hablaha saaxiibadeed inta badan ku xaman jireen tani waa **Nugul**. Iyada oo markaa Innaanays looga dhigay **(Sagal Nugul)** lakin yadii waxa ayba u aragtay magac qurux badan maadaama wiilkii ay jecelayd daraadii loogu bixinyey Nugul. Sagal wixii ay mar xaladaa inaanaysta yeelatay ay ku jirtaba waxa la gaadhay xiligii ehel iyo asxaabiba ay go’aansadeen inay labadooda issa-seejiyaan qorshe kastaba hawgu kacdee. Dhanka kale inantii Sagal saaxiibadeed waa Lasoo doontay oo waxa guursaday nin aad u ladan oo ay xigto ahaayeen waxaana markaa loo raray Caasimada Dalka Muqdisho. Sidaa daraadeed Sagal waxa ay

noqotay qof saaxiibkii aadka ugu dhowaana uu ka tegay iyadiina ay cadow aad u fara badan ku yeelatay bulshada dhexdeeda. Wiilkii Sakariye ahhaana waa la mid oo rag kale ayaa doonayo inay sejiyaan inanta si kasta u ladan ee dhan dhaqale, Cilmi, karti iyo weliba qurux isku darsatay inay ka hantaan isagana seejiyaan. Oo si hoos ah ayey waxay u maleegayaan qorsho layskaga horkeenayo inanta wallaalkeed iyo Sakariye. Sakariye isagu waa cad yahay arinkiisu oo laga fili maayo in uu wax u geysto wiilka Sagal ay walaalaha yihiin lakin waxa shaki aan ku jirin. In wiilka Sagal wallalkeed uu yeeli doono ama uu ka xanaaqi doono arintaa suuqa ku jirta sidaa daraadeed waxa fursad lagu raadinayaa sidii loo heli lahaa meelaha ay ku kulmaan Sagal iyo Sakariye ama loo heli lahaa wax yaabaha ay markaa isku qoraan ama ay is waydaarsaden sida qoraalo ama Sawiro lakin hore waa ugu suurto geli weydey. Nin aad u dhib badan oo asxaabta Sakariye ka mid ahaa oo dadka aan hore wax u dhaadin ah ayaa arintii loo sheegay waxana loogu daray hadii aad arintaa gashid sharad baan bixinaynaa. Wiilkani waa dadka aad wax u maleega qorshayaasha badanna dhiga waxa taas u sii raacda waa nin dad aad u fara badan ku xidhan. Waxa uu ugu jawaabay hadii aad sharad ogoshihiin wixii aad itiraahdan yeel baan yeelayaa lakin sharadka ha laysheego waxa lagu yidhi adigu wax qabso markaa ayuu yidhi meesha kubada habeenkii lagu ciyaaro ayaad bil iga bixinaysan anna waan soo afjarayaa waxa aad ii dirtaan. Waayahay ayaa loogu wada jawaabay.

# SAGAL IYO SAKARIYE

Wuxu yidhi hadaba ila wadaaga waxa ay tahay in aan qabto iyo qaabka aad wax u rabtaanba. Waxa lagu yidhi waxa la rabaa Sakariye iyo Sagal in aad kala geysid oo aad isku dirtid. Markaa ayuu yidhi nin yahow arintaasi dee waa arin adag’e mida kale inanta si wacan uma aqaan soo mahan. Waxa lagu yidhi waxas ka bax adigu oo inanta wallakeed soo ma taqaanid haa ayuu ugu jawaabay. Markaa ayey dheheen hadaba maxad ku fali garashadeeda iyada. Haye ayuu ugu jawabay waxa uuna sameeyey markaa. Arintii ayuu u hawl galay aniga sidii aan ukala gayn lahaa soo laygama rabo uun? Haa ayaa loogu jawaabay. Waayahay iga war suga ayuu ku yidhi. Isla markiiba waxa uu wacay Sakariye oo markaa uu ku balamiyey meel suuqa ah. Markii ay kul meenna waxa uu ku yidhi nin yahow arin baan rabaa in aad ila dhamaysee goorma ayaad wakhti haysaa. Waxa uu ugu jawabay nin yahaw caawa hawlo ayaan leeyahaye berri inooga dhig. Waa intuu doonayee wuxu yidhi hadaba waa yehee caawa inta aadan arinta aadin ma ku heli karaa markaa ayuu ugu jawabay wallaal arintu waa fiidkii lakin berri waa balan ayuu ugu jawaabay. Ninkani waa inta uu rabaye haye ayuu ku yidhi waana ka dhaqaaqay isaga oo iska dhigaya mid tegay ayuu eegay meesha uu u dhaqaaqay Sakariye waxana u sameeyey Dabagal qaab weliba farsamaysan. Wixii sidaa uu hadba meel uga dabagalaba aakhirkii waxa soo dhowaatay salaadii makhrib. Sakariye waxa uu u jahaystay xagaa iyo masaajidka si uu markaa salaada iskaga soo saaro. Wiilkii kalena waaka dabagalay waxana laysku arkay meeshii

waysada waxana uu ku yidhi war nin yohow xumidaa soo adigii igu yidhi waxan leeyahay arin markaa ayuu ugu jawaabay wallaal waa bacda salaada Makhrib. Dhoosha ayuu ka qoslay, haa ayuu ku yidhi isaga oo qalbiga ka qoslaya. Salaadii ayaa layska wada tukaday oo midba dhiniciisa ayuu masaajidka salaada kaga xidhay wallow uu aad mar kasta uga danbeeyo wiilku Sakariye oo eegayo meesha uu wax marinayo. Markii laga soo baxay Salaadi ayaa waxa Sakariye wejiga saaray halkaa iyo xaafadiisii. Wiilkii waxa uu wacay Sagal wallalkeed oo uu ku yidhi nin yahow arin baan kaa leeyahaye caawa mays arki karnaa wiilkii ayaa ugu jawaabay haa waa caadi wakhti waan hayaaye ayaa laysku maca salaameeyey. Waxa meel aan guriga ka fogayn oo meherad cabitaana ku wada kulmay Sagal iyo Sakariye waana meel qaab qurux badan u diyaarsan oo markaa qaabka meelaha Casriga ah loo habeeyey. Waxa uu ka qaaday sawiro aad u fara badan isaga oo markaa isku deyeya inuu ka qaado sawirba sawirka uu ka muuqaal cad yahay. Kedibna waa iska laabtay oo waxa uu aaday halkaa iyo suuga weliba meeshii uu kula balan sanaa Sagal wallaalkeed. Wiilkii waa lays helay isbariidin iyo wada hadal dheer ka bacdi waxa uu ku yidhi nin yahow qofbaa hada sawiro iisoo diray hada eeg gabadhani miyaanay tii shoodhadaada ahayn mise waa indhahayga ayuu ku yidhi waa eegay mise waa Sagal. Waxa uu yidhi goorma ayaa laguu soo diray Sawiradan waxana uu yidhi hada adigu sacad ka hor waxa uu waydiiyey meesha nin yahow ma garan halka ay tahay anigu garan maayee. Inta uu iska

dhigay mid si wacan wax u eegaya ayuu yidhi nin yahow miyaanay meshani ahayn maqaaxidii ina hebel ee u dhowayd Gurigii Sakariye. Allah waa laftirkeedii intuu yidhi ayuu gaadhiga si deg deg ah u fuulay oo meeshii ku cararay waxa uu soo gaadhay iyaga oo markaa cabitaanadii iyo shekadoodii dhamaystay oo is macasalamaynaya. Wiilkii sidii uu usoo socday waxa u dagaal ku bilaabay Sakariye. Sakariyena waxa uu isku deyey in uu iska qabto wiilka laakiin nin aad u xoog weyn ayuu ahaaye muusan awoodin inuu wada qabto. Dadkii meesha taagnaa ayaa ku soo yaacay oo kala qabtay isla markiiba laakiin intii lakala qabaneyey ayaa waxa meel nabar ka gaadhay Sagal wallaalkeed oo beri hore wax kaga dheceen. Arintaasi waxa ay hawada ku sii laashay nabadii. Gabadhii walaashii ayuu ka kexeeyey meeshii isaga oo ku cel celinaya aniga ayaa kibriyey oo u ogolaaday inay u socoto sidii madaxdee. Bal waxan ku tusi doonaa qaabka ay xabisidu leedahay. Sakariyena meeshii ayuu iskaga tegay isaga oo niyad jab la'tiicaya ayuu xagaa iyo xaafadii iska qabtay. Sagal sidii loo sii waday ayaa xaafadii la geeyey wiilkiina oo nabar ku yaalo markii uu odaygii aabeheed arkayna afka ayuu furtay isaga oo aan ogayn waxa dhacay lakin qiyaasaya in dagaal dhacay. Waxa qaylisay iyana hooyadeed oo tidhi naa barakada alle kaa qaadye maxad samaysay oo aad reerka u soo hoysay. Wiilkii ayaa yidhi waxan ka soo kexeeyey meel shaaric ah iyada oo la joogta ina hebelkii reerkoodu raga inaga laayeen. Islaantii waxa ay qabsatay baroor iyada oo leh dhiig iyo uus toona malahan

ma waxay la socotaa reerka meydkiyo dhaawucu ina dhex yaaley. Markaa ayey Sagal tidhi hooyo sida arintu mahan ee ha fogayn inta markii ay tidhi ayaa aabeheed oo arinta maqlayeyna soo booday oo intuu gacanta ku dhegay Qol halkan ah ku xidhay. Wax yar ka bacdi waxana uu ku yidhi hadii mar danbe aan kugu arko labadiinaba xabad wax aan ahayn idinka waraabin maayo taas ku biyo cab. Waa inane waa iska aamustay waxna maysan oran laakiin xaafadii oo dhan ayaa buuq iyo qaylo is qabsatay iyada oo waalidkeed leeyihiin way qooqday maxay hadii ay nin rabto anaga noola tashay weydey. Oo uu markaa odaygu ku qaylinayo inanta hooyadeed oo ku leh adiga ayaa waxas ugu wacan oo madaxa u sii daayey gabadhan yar. Hada ayaan waxan u meherin wiilkii walaashay dhashay ee lasocda. Walalkeedna waxa uu ku yidhi Aabe maad inyar u kaadisid inantu wax barashay wadaaye mida kale wiilkan yar anigaa meel ka saarayee adigu inanta iyada oo aan wax barashadeeda dhamaysan guur haw qorshayne u akaadi. Waxa uu ugu jawaabay adiyo hooyadaa isma dhaantaan oo caqligiina ayaan ka arkaa inaad wax magarato tihiin ee faraha iiga qaada arintaa aniga. Wiilkii oo sina u diidan sina wax uu sameeyo garanla’a ayaa iska aamusay laakiin Sagal waxay u noqotay saacado iyo habeeno aad u madow sidoo kale Sakariyena la mid ayuu ahaa oo wax uu sameeyo ayuu garan waayey waxa uu soo wacay Sagal oo is yidhi bal ka wardoon sida xaalkeedu yahay. Laakiin umaysan suurto gelin waayo

wax telefan ah ma haysato oo waxa telefankii ka qaday wallalkeed waana dansan yahay.
Waxa ay arintii sidaa u murug-sanaataba saacado iyo habeeno ayaa is gudub dhaafay. Sidoo kale labadoodiina wax ay sameeyaan ayey garan waayeen oo midba midka kale ayuu ka welwel qabaa. Dhawr caana maal ka dib ayaa Sagal oo aad u diifaysan wallalkeed ku yidhi walale maxaa sidan oo dhan ugu xumaatay wuxuuna isku deyey in uu u caqli celiyo inanta lakin Sagal hadal uma eka oo ilmada ayey ceshan weydey iyada oo kuleh wallaal wax fiican maadan samayn. Laakiin maadaama wallalked uu aad u jeclaa waxa uu siiyey telefankeedii. Isla markiiba waxa ay wacday Sakariye oo isna inta uu la’aa cuntiyo baad kala quusteen. Waxa uuna mudadaa ku sugnaa welwel iyo walbahaar waxa uu ka go’ay cuntadii iyo dhamaan wixii anfac dhuunta marayeyba. Isaga oo markaa looga shaki qabey inuu xanuun aad u darani hayo markaa xitaa waxa ladamcay in dhakhtar lageeyo wuuna iska diiday ileen waa nin og meesha laga haystee waana oran kari waayey Jacayl kaygii baa iga maqan. Talefankii waxa uu la noqday markii uu arkay inuu dhacayo riyo riyo oo wuxuu is yidhi nin yahow mallaha waa niyadaada oo kumaysoo wicin. Laakiin waa xaqiiqsaday inay Sagal tahay cida soo wacaysaa waana labooday oo yidhi qaali iiwaran side iitahayna. Waxay ugu jawaabtay qaali waan kuu fiicanahay. Wax aan ku dhaho garan maayo oo xaal kaygu mahan sidii aad igu taqaanay waa mida kale Aabe waxa uu ii wadaa qorshe laygu guurinayo. Ta kalena waxa ay tahay waxan

ka baqayaa in aan noloshayda ku waayo. Wuxu ugu jawaabay. Qaali niyadaada Khayr u sheeg waxan waynu ka gudbi doonaa oo waxan noqon doonaa labo isku danbeeya marka qaali farxadu waa danbaysada welwelka iska saar. Intaas ayuu ugu niyad qaboojiyey laakiin laftirkiisu waa dareemay inuu xaalku meel sahlan uusan marayn.

Waxana uu aad uga fekeray qaabkii uu wax yeeli lahaa iyo wixii uu ku dhaqaaqi lahaa waayo meel wuu wax ka bilaabo ayuu garan waayey. Sagal dhankeeda kale waxa ay iska gashay gurigii oo ay markii hore hortaagnayd waxana isha si ullasii raacay aabeheed oo daarada fadhiya waxanuna ku yidhi walee aniyo inan yari tallo ma wada yeelano. Walalkeed oo aan goobta ka fogayn ayaa niyada ka yidhi “walee anna Sagal wax waan la qabtaa” oo uu qolkiisa hore u sii galay. Sagal iyo Sakariye waxa u cad qorshe. Sidoo kale waxa ay la yaaban yihiin wixii ay samayn lahaayeen. Sakariye waxaa uu maskaxda rog rogaba waxa uu go’aan saday wax kasta haday dhacayaan inuu inanta la baxsado oo uu aado halkaa iyo Bari oo ay markaa ku noolayd islaan eedadii ah oo hantiile fiican ah. Laakiin waxa uu mar kasta is waydiinayaa waa Sagal inay ku raaci doonto qorshahaa iyo inay ku diidi doonto oo waa uu ka baqayaa inuu waydiiyo. Laakiin Sagal ayaaba soo wacday isaga oo weli aan fikirkiisii ka dhamaan. Waana issasalaamen waxana lays-waydaarsaday laba eray oo keliya. Intaa hadii lays dhaafsaday waxa qolka inanta ugu soo galay aabeheed oo u yidhi naa maxad ku hadlaysaa?

# SAGAL IYO SAKARIYE

Labadoodiiba waa nexeen oo telefankii ayey si hal haleela u jareen. Odaygii ayaa yidhi waa lagu soo doontay oo wiilkii walashay dhashay baan kugu dari galabtana waa laguu soo gogol fadhiisan. Sidaa ula soco wiilkan yar ee aad hoosta ku wadatana iska illow hadii kale labadiinaba meel aan ogahay ayaa idin hurran! Sagal waxa ay Qabsatay Baroor iyada oo ku calaacalaysa aabow ii naxariiso oo aniga haysiin wiil aanan waxba ka aqoon. Laakiin yaa arintaa ka dhegaysan kara islaantiina waxaba ay iska soo jartay naa soo lebiso, soo gogol qolka fadhiga, ragana shah usoo kari. Islaantu waa war moog oo qofka ay la hadlaysaaba mahan qofkan hortaagan ee waa qof jidhkiisa oo kaliya meesha ka muuqdo. Wiilkii wallalkeed ahaa ayaa qolka ugu soo galay isaga oo ku leh wallalo iga raali noqo maanan moodayn in arintu halkaa gaadhayso laakin waa balan wixii aad iga codsato in aan kuu qabto waxay ugu jawaabtay wallal **(Ninna waa gaaridii nina waa Farxadii)** miyaad labadaa kala bedeli karta wiilkii waxa uu mooday inay leedahay wan is dilayaa oo intuu naxay buu yidhi wallalo side wax u rabtaa. Markaa ayey tidhi walal guurkaa miyaad iga hor istaaagi kartaa waa maya soo mahan. Intuu cabaar aamusay ayuu yidhi garan maayo si aan wax kuu iraahdo iyo meel aan wax ka bilaabo toona. Ee maxaan sameeyaa walaalo bal adigu wax uun igu dheh waxayna ku tidhi. Hadii aad walaashaa jeceshay doonaysana inay weligeed walaashaa ahaato guurkaa hor istaag ama iga hordhaqaaq waxba ii tari mayside inaad aniga niyada uun ii dhistee.

# SAGAL IYO SAKARIYE

Intuu sii booday buu yidhi wallalo hadhow marka hawsha laga hadlayo baan ka hadlayaa hadaba. Waxanu uu isku deyey bal marka hore inuu niyada u dejiyo. Laakiin waa qof caqligeeda rabi u buuxshee ma waxas ayey fahmi waayeysaa waxay tidhi wallal mahadsanid. Waana ka dhaqaaqday, isaga oo dareensan inay fahan santahay inuu niyada u dhisayo ayuu waxa uu isku ciil kaanbiyey wixii uu sameeyey. Kedib waxa uu go'aan ku gaadhay inuu arintaa marka ragu yimaado inuu kala kiciyo laakiin qorshe mahayo oo waxa uu ka fekerayaa qaabkii uu u hawlgeli lahaa. Lakin wakhtigu ku sugi maayee waxa lagaadhay xiligii ay reerku soo gogol fadhiisan lahayeen. Oo waxa hal mar albaabka soo garaacay reerkii gabadha soo doontay waxana ay noqotay raga halasoo dhaweeyo oo halala gogol fadhiisto. Markii laysku soo dhamaaday oo ragii soo gogol fadhiisteen ayaa odaygii wiilka dhalay hadlay oo yiri waxan Idinka soo gogol fadhiisanay Sagal. Wallalkeed oo aad moodo in nabar lagu dhuftay ayaa yiri horta maad nooga war bixisan wiilka waxa uu qabto iyo waxa uu hada isla hayaba. Odaygii Sagal aabehede ayaa yiri oo ma walalkaa ayad cid ka waraysan adiguba maad waraysatid. Isna waxa uu ku jawaabay oo walalkay haduu yahay side buu ku geeyey walalashay ma walala is guursada waa Su'aal waxa odayadii ka soo wada hadhay af kala qaad iyo wiilka aabihii oo halmar intuu soo booday yiri orod oo debeda nooga bax waxba ku hadli mayside. Wiilkii waa soo cadho baxay. Dhanka kale waxa ferkiisii dheeraa weli ku maqan Sakariye oo qorshaynaya Safar dheer

laakiin ka walaacsan inay Sagal diido. Wixii uu aamusnaaba waxa uu soo wacay Sagal kuna yiri waan soo fekeray qaali. Maxad kusoo fekertay bay tidhi waxana uu yidhi wax labadeenaba inoo dana. Ubadka mustaqbalkeenana u dana. Waxay ku tidhi maxad ka wadaa. Wuxu ugu jawabay waxan ku fekeray inaynu bax sano oo aan markaa aadno xagaa iyo Bari oo ay Eedaday degan tahay. Inanti Sagal waa Aamustay oo ay cabaar feker dheer ku maqnayd waxayna tidhi oo qaali hadii aan khatar galnana? Wuxuu ugu jawaabay iskadaa khatartee waxan diyaar u ahay wax kasta in aan u maro jacaylka aan kuu qabo waa fekertay hadana. Cabaar ka bacdi ayey tidhi waayahay diyaar ayaan ahay. Wuxu ugu jawaabay hadal ad moodo inuu muda badan sugayey qaali xilima ayaan kusoo doonaa waxan inoo diyaarin gaadhigii aan ku bixi lahayne. Waxay tidhi qaali waa in xili dadka iyo duunyaduba wax kala ogayn aan baxnaa si aan anna hore laygu tebin oo markaa laynoo qaban. Waxa uu yidhi anigaa garan caawa marka uu habeenku kala badhan yahay baan gaadhi inoo soo ingaydhi markaa ayaan baxaynaa telefoonadeenana waan qubaynaa. Waayahay iyo sidaa weeye yaa laysku af gartay habeenkii markii uu dhacay ayaa la diyaar garoobay oo laysku diyaariyey in la boxo. Lakin waxa uu wiilkii hore u waayey lacag xaga ingaydhka ah ayaa iska dhintay markaa ayuu la soo hadlay Sagal oo ku yidhi Sagaleey qaali lacag baa iska kay dhintee ii dul qaado. Isla markiiba inta ay soo booday ayey tidhi qaali maxaa iska kaa dhimay oo intuusan hadlinba waxay ugu

shubtay lacagtii uu rabay mid ka badan. Waa diiday hadana waxay ku tidhi soo maad oran waxba ma kala lihin side ayaad lacag u diidi kartaa. Waa iska aamusay haye ayuu yidhi gaadhigiina waa keenay. Waxay isku diyaariyeen wadadaa bari inay afka saaraan waaba saareene. Laakiin intii ay wadada hayeen ayuu waxa uu markasta ku soo celcelinayey.

- **Allow Sagashaan naftayda la rabo**
- **Allow nolosheeda ii asturoo**
- **Allow hayseejin Sagal Nugul**

Laakiin nasiib daro waxa halmar dhanka kale isku rogay gaadhigii ay wateen oo waxa uu fooda daray dhulka wixii uu cabaar is rog rogaba waxa uu kala dhacay meel haadaan ah ama bohol ah. Waa murugo hor leh oo lama filaan ku dhacdey laakiin waxa ka sii naxdin badnayd markii wiilkii la kala garan waayey inuu dhintay iyo inuu nool yahay. Waxaana sababay is-rog rogii faraha badnaa ee gaadhigu is rogrogayey ayaa waxa bur buray dhamaan uurku jirta wiilka  oo dhan waxana halkaa ka dhacay dhiig bax gudaha ah taas oo sababtay in wiilku neefsan kari waayo sidoo kalena loo tuhmo in uu dhintay maadaama labada qof midna wax ka aqoon qaybta caafimaadka.
Inantiina waxa ay markaa barkatay ama ay ka jabtay lug iyo gacan is waydaara oo markaa maysan dareeminba maadaama ay ahayd qof markaa dhaqdhaqaaqi kara waxana markiiba ay

iska dhaadhiciyeen in wiilku dhintay maadaama uu san neefsanayn nuux nuuxsanayna in uu dhintay. Inyar ka bacdi meeshii waxa soo gaadhay gurmad kala duwan oo wiilkii iyo inantii ula cararay dhakhtar halkaa oo wiilkii dareewalka ahaa isagu aanay wax wayni gaadhin marka laga reebo xoogaa yar xagtimo mooyaana. Qofka laakiin laysku hayey in uun nool yahay iyo in u dhintay wuxu ahaa Sakariye. Xoogaa ka bacdi waxa Iyana miyir beeshay inantii laakiin dhakhaatiirtii magaalada ayaa labadoodaba u wacay waalidiintoodii Sagal aabeheed waxa uu markiiba yimid dhakhtarkii maadaama uu ahaa qof isagu gaadhi wata oo wuxu uga soo horeeyey qoskii kale waxana uu sameeyey markiiba markii uu ogaaday in gabadhiisu nooshahay. Dhakhtar heer caalami ah wiilkii kalena ayada oo uu qolka qaliinka ku jiro ayuu ka tegay inyar ka bacdina waxa meeshii soo gaadhay waalidiintii wiilka oo markaa maalmo ku dabiibay dhakhtarkii. Wiilkii waxa uu noqday dhaawac culus oo lagu khasbanaaday in loo qaado xagaa iyo caasimada dalka ee Muqdisho. Inantiise lacagi waa belaayee markii ba waxa loo qaaday wadamadii deriska ahaa. Oo waxa la geeyey itoobiya isla markaana waxa laga dhaadhiciyey in wiilkii Sakariye uu dhintay isla maalintii markii uu waagii beryeyna la aasay. Oo nin kaasi waxa uu noqday wiil aakhiro loo rajeeyey lakin illaah dilaa dhintee wiilku waxa uu ku baraarugay isaga oo xamar yaala lakin qaliimo farabadan la mariyey. Iska markii uu dhakhtarka ku soo baraarugay hadalkiisii ugu horeeyey waxa uu ka bilaabay aaway Sagal?

# SAGAL IYO SAKARIYE

Ma nooshahayse waxa markaa la hadashay inan walaashii ah oo ku tidhi walal waa nooshahay markii aan Xamar u soo baxayey ayaa laygu yidhi waxa loo qaaday wadanka debediisa. Wadanka debediisa aa! oo wadankee loo qaaday imisa ayaana ka soo wareegtay waxa ay tidhi wallale inta aan Xamar joognaba dee waa sii maqan yihiin wadanka loo qaadayna garan maayo oo maanan sii waydiin wadanka uu yahayba. Sakariye waxa loo taagay Murugo iyo welwel hadii uu is yari kacba waxa ku jira biro iyo meel walba Kabniin. Wuu naxay oo wuxuu ku hadlo ayuu garan waayey wuxu mar kale walaashii weydiiyey. Imisa ayaan hada ku suganahay halkan waxayna ugu jawaabtay wallaal ilaa iyo sadex Isbuuc.Qalbadiiba miyaanay jabin marka uu intaa maqlay. Waxayna kaga dhegtay aniyo Sagal Ma isaseegnay Aniyo Sagal ma isaseegnay. Kedib walaashii ayaa soo booday oo tidhi walal bisinkee waxas ha ku hadlin mida kale imisa dumarka ah ayaa ku nool dunidan aan maanta joogno kuna darsoo maanta Xamar ayaad joogtaa oo waxad helaysaa kumanaan ka cilmiyo iyo karti badan ee waxas inaga daa hada waxa inoo yaala sidii aad ku caafimaadi lahayde. Wuxu ku hadlo intuu garan waayey ayuu ku yidhi. Kula yaabi maayo oo dunida dadka jooga ayaaba qaybiba nooc u fekertaa.

- **Gacalooy walaaleey aduunyadan kal gacalkiyo caashaqeedu badan yahay**

# SAGAL IYO SAKARIYE

- **Gacal iyo xigaalkuba Kalgacayl la'aantii may wada dhismeenoo isimuu hiloobeen**
- **Gacmahaygan wada jaban ee birihu ka buuxaan waxa iiga siidaran Sagal aan arkaynoo meesha ay ku sugan tahay qalbigaygu sheegayn**
- **Gaadiidkay raacdiyo goobtay ku sugan tahay aan maanta garanayn**
- **Adna waxad ebyeysaa inaan duul kaloo jira aan ubax u qaadee malaa waad halawdaye**
- **Geeraan ka xigayaa in-aan inan yaroo kale gacalooy idhaahdaa Sagal baan rajaynoo**
- **Saqda dhexe habeenkii aayadaha quraankaan eebehay ku tuugiye**
- **Intaynaan col wada noqon Igadaa odhaahdiyo hadaladaad ileedahay**

Intaa markii uu yiri ayey tidhi walalle anigu adigaan wax kula rabaaye raali noqo mid kale walal inanta aad sidaa oo dhan ugu bugto ee aad xitaa doonayso inaad igu colaadiso tollow ma tahay adiga mid kuu og mase tahay mid kula dareen ah oo sidaa aad u jeceshahay adigana kuu jecel. Inta uu qoslay oo dhoola cadeeyey ayuu yidhi malaha gudcur baad gudaysa wallale waxan hubaa amarka eebe waa halkiisee inay iyadu aniga iga daran tahay. Allah tollow sidee hada ay tahay yaa keliya oo iiga soo war bixiya xaalkeeda iyo halka ay ku sugay tahay.

# SAGAL IYO SAKARIYE

Dhanka kale Inantii Sagal hayd waxa ay rugo dhigatay dalka aan deriska nahay Itobiya iyada oo markaa qaab dhoof ah loo wado si markaa wadankaba looga haajiriyo oo aysan ninkan dib oo u danbaysa xogtiisa uga war helin. Meel illahay wax ka wadaa waa si kale'e waxa Sagal ay aamintay inuu Sakariye nool yahay oo uu meel uun ku sugan yahay waxay sidoo kale aamintay inay maalin uun la kulmi doonto wixii dhacaaba ha dhecee sidoo kale waxay aad ugu dadaashay inay dhimashadiisii xaqiijiso wallow dadka isku yaqaanaa ay yaraayen marka laga reebe ehelkiyo asxaabta hadana cid ay waydiiso way garan weydey laakiin waxay aad ugu dadaashay inay xaalka saxda ah ogaato waxa ay ka go'aday cuniyo baad quudasho dhan waxana reerkii soo wajahay welwel ay u qabaan inay inantu gaajo u dhimato oo waxay aad ugu dadaaleen inay xitaa ay maaweeliyaan oo maalin walba inta gaadhi lagu qado ayaa waxa la geyaa beeraha dalxiiska ee dalka Itobiya caanka ku yahay. Ma qof waxas oo dhami u muuqdaanbaa waxa u muuqda keliya inay war ka hesho Sakariye'ee. Waa Dhaawac Sagal oo waa qof laba meelood ka jaban hadana sidaa ay tahay uma dhaqanto sidii qof jabay oo la dabiibayee waxayba isku aragtaa tii dadkoo dhan ugu xooga wayneed oo mar la arkaba intay guriga daaqadiisa ka soo dhacdo ayey waxay timaadoo meel aan guriga sidaa uga fogayn oo meel aad u jawi degan oo fekerka aad ugu haboon ah iyada oo markaa xasuusihiisii hore iyo berisamaadkii ay

wada sheekaysan jireen xasuusanaysa ayey marba niyada waxad aad uga tidhaahdaa allah yaa maalmo dib ii ceshana si aan keliya ugu jawi degsado maalmihii naruurada. Wixii sidaa ay ahaataba waxay meeshii ku baratay inan iyana markaa Somali ah oo dhoof u socdo inantii ayey iskala saaxiibtay oo waxay uga waran tahay qisadii ku dhacday iyo xaalku hada meesha uu taagan yahay. Inantii waxay ahayd dadka aadka u qalbi jilicsane waxay iyana dhankeeda kasoo gashay halganka lagu raadinayo Sakariye. Inantan ay is barteen waxa la dhahaa Nimco. Nimco waa inan aad iyo aad u dadaal badan shacbiyad badana hada waxay ku sii darsataay waa dadka baraha bulshada caanka ka ah. Taasina waxay kalsooni gelisay Sagal oo waxay is tidhi wallee gabadhani midhaa waa shinbirkii laguu soo diray ee kaa caawin lahaa raadintii Sakariye. Oo waxay ku tidhi walale Nimcooy illahay haku garab galee arintaa ila garab gal oo ila raadi wiilka. Isla ayaamahaaba Nmico waxay qaaday Olole loogu magacdaray **“Isla Raadsha naftooda”** Ololahaas oo ay labadooda magac is aan toos ahayn ugu xustay marka laga reebo inay xaga baraha bulshada kaga jirto side kale waxa ay aad ugu dadaashay inay raadiso dhalin yaradii magaalada ay labadooduba kasoo jeedaan inay cid kale ka hesho si ay markaa u ogaato wiilku inuu yahay mid ka hooseeya ama markaa mid ifka jooga oo nool. Mudo wixii ay sidaa ku wadaanba waxa ay isheleen inan iyana kasoo jeda magalada ay Sakariye iyo Sagal ka soo jeedaan oo laftirkeedo baraha bulshada dhalinta ku foogan ah. Waxa laysku garab saday inay

inantani magaaladii ka raadiso cid si toos ah u taqaana Sakariye iyo sidoo kale inuu dhintay ama nool yahay inay soo kala xaqiijiso. Sagal weli iyadu waxa haya welwel aad u wayn oo waxad moodaa in marba marka kasii danbaysa rajadeedu sii xumaanayso oo niyad jab wayne uu hayo. Sidoo kale waxa garab socda odaygii Sagal dhalay oo doonaya in uu mar kasta Sagal uu ku daro wiil uu abti u yahay sidoo kalena yara ladan. Laakiin waxa mar kasta isna xaga Sagal xiga oo dareemaya inuu ku khaladamay Sagal walalked oo mar kasta odayga hortaagan oo leh Aabe sug inantu ha bogsadee oo mar xaaladahan ay dhexda kaga jirto dhan uun hawga soo baxdee Lakin odaygu mid waxas u dhegtaaya mahan oo waxa u cad isaga tiisa iyo in uu inantaa meel ku hubsado si ay iskaga illowdo Sakariye. Xamar iyo Sakariyena waa isla xumaadeen Sakariye tamar uu cisbitaalka kaga baxo waa adagtahay maadaama uu yahay nin dhaawacyo badan qaba socodkuna aad u dhibayo madama ay uurku jirtiisu wax gaadheen sidoo kalena ay birro ku jiraan. Lakin isaga isla markiiba waxa uu xidhiidh la yeeshay axaabtiisii ragii ugu dhowaa markaana uu ku kalsoonaa. Waxanuna la hadlay saaxibkii Ilyas waxana uu ku yidhi saaxiib macan mar aan kuu hagar bixilahaa waxa jira marka dhibi ku haysatee waxan rabaa in aad geed dheer iyo mid gaabanba u fuushid sidii aad war dhamaystiran aad iiga keeni lahayd Sagal nolol iyo geeri Meesha ay maanta ku danbayso. Sidoo kale ogowna waxad noqon doontaa nin aan abaal weyn uga hayn doono wax qabadkaa iyo garab istaaga.

# SAGAL IYO SAKARIYE

Ilyas waxa uu ugu jawaabay go'aansadayna inuu arintaa uu la qabto saaxiibkii waxana uu yidhi saaxiib ka seexo arintaa anaad igu ogtahay in aan war sax ah kaaga keeno laakiin adigu waxad isiisaa wakhti yar adigu qiyas ahaan ilaa isbuuc waxan balan kaaga qaadi in aan war sax ah oo aan ku noqosho lahayn kusoo siiyo mahadsanid ayuu Sakariye ugu jawaabay sidoo kale Sakariye waxa uu baadi doon keedii galay Sagal saaxiibadeedii berigii la guursaday ee loo soo raray xagan iyo Xamar sidoo kalena uu ogaa inay xamar degan tahay laakiin nasiib daro muusan heli oo facebook gii uu ku yaqaanay waa ka guurtay sidoo kale wuxu aad qoraalo ugu qori jiray Sagal keedii lakin nasiib daro kaasi wax awood ah umaysan lahayn oo mobile iyo wax kasta waa laga dhaariyey sidoo kale Sagal ma ahayn dadka xaga baraha bulshada aad u daneeya taasina waxay sahashay inay illowdo dhamaan wixii Baraha bulshada ahaa ee ay isticmaali jirtay. Lambarkii sirta ahhaa madaama badankoodu isku mid ay ahaayeen. Lakin hadana Hadiyo jeer waxay ku dadaali jirtay inay hesho ama xasuusato wixii uu lambarkeedii sirta ahhaa. Lakin taasi waxa ay socotaba waxay ku dhamaatay guuldaro. Dhanka kale Ilyas ayaa waxa uu soo ogaada horta Sagal inaysan Somaliya joogin sidoo kalena qorshe dhoof loo kexeeyey laakiin xiliga ay tahay inay dhoofto musan soo ogaan sidoo kale waxa uusan si wacan u xaqiijin dalka ay hada ku sugan tahay in uu Itoobiya yahay iyo in uu Kenya yahay. Wuxuuse sameeyey dabagal aad u wayn. Intii uu daba galka ku maqnaa waxa isna dhakhtarkii laga soo saaray

# SAGAL IYO SAKARIYE

Sakariye oo markaa aad moodaa inuu soo yara caafimaaday. Lakin weli nin xoogan oo socon kara Safarna geli kara mahan oo waa nin aad u dhaawac u gaadhay wuxuuna ku boodayaa laba birood. Fursad fiican ayuuse u helay in uu Sagal si wanagsan u raadsho kuna dhiirado wada kasta oo uu isleeyahay waad ku heli kartaa. Nasiib wanaagse waxa maalin maalmaha ka mid ah ku kulmay Suuqa wayn ee Bakaaraha Sakariye walaashii iyo Sumayo oo hayd Sagal saaxiibadeed. Sumayo ma ahayn qof wax la socota oo waa hooyo markaa hal cunug u joogo. Wallow hadaba aysan si wacan isku aqoon Sumayo iyo Rooda oo Sakariye walaashii ah, hadana markii lays arkay waa laysku bohoobay oo lays waraystay iyada oo markaa laga sheekaystay wax fara badan sida wadankii iyo halkani siday tahay inay Sumayo halkan iskaga ladan tahay odaygeeduna yahay nin iska ladan iyaduna mar mar wax barasho aado inta kalena ay hooyo tahay oo ay iska haysato cunugeeda. Wixii cabar laysku waramaba halmar ayaa Sumayo soo boodoo tidhi naa horta Roodaay xagee ku danbeeyey Xidhiidhkii Sakariye iyo Sagal anigu waxan ka soo baxay dhulkii iyaga oo aad isku jecel oo layskuna xanto yacni dhalinyaradu aad iskugu xamato xitaa waxan Xasuustaa in Sagal loo bixiyey **Sagal Nugul** wiilkaa walalkaa ah dareedii yacni siday u jecelayd. Rooda ayaa ku tidhi Sumayo labadoodii qiso aad u xanuun badan ayaa kala gaadhay oo xitaa labadoodaba waxa ladhacay gaadhi oo wakhti xaadirkan aan kula hadlayo waxan siday Sakariye oo burburay meelo badana kana jabay uurku

jirtuna waxbay qabtaa baydheheen dhakhaatiirtu. Allah bisinka ayey Sumayo ku jawaabtay oo markaa hada xaalku xagee marayaan iiga waran Sagal iyaada side wax u gaadheen. Sagal iyadu waa ka ladnayd Sakariye lakin waxa laygu yidhi dhakhtar debeda ah ayaa loo dhigay oo hada kuma sugna magaaladii wiilkii walalkayna aad ayuu u raadinayaa sidoo kale xitaa cid ayuu u diray si ay ugu soo ogdaadaan Meesha ay u baxday ama la geeyey. Ee horta adigu ii sheeg bal telefankaaga aan kula soo xidhiidhe mida kale miyaad garanaysaa cid kuu sheegi karta maanta meel Sagal ku sugan tahay waxa ay Sumayo la soo booday haa oo dee deriskoo dhan baa wada garanayaa hadii aan wacana waan helayaa xogtoo dhan. waxa Rooda ugu jawaabtay walaley raadi oo isoo sheeg hadii aad cid hesho wiilkaa walalkay anigu garan maayo meel uu ku danbaydoonee laakiin hadana waan iska caawin isba waa icaawin lahaaye. Waxa Sumayo tidhi wallaalo haye hada waxa isoo socda oo iqaadaya odaygaygiiye hadhowna waan kula soo hadli haye ayey ku kala dhaqaaqeen iyo ismaqal danboo xiisa leh. Itoobiya iyo inantii Sagal ahayd waxay dhankeeda ka raadinaysaa wiilkii Sakariye ahhaa iyada oo la kaashanaysa Nimco.
Sagal waxay maal mahaa ka maqashay NImco oo dhegaysanaysa

**Heestii Khadra Daahir Ilaahay Naxariistiisii Jano haka waraabshee**

ee oran jirtay

# SAGAL IYO SAKARIYE

- **Adigaan ku Yaahshaa**
- **Ku yaboohiyaa weli**
- **Yuuskana aday baday**

Inaataas ayey kala baxday iyada oo u arkaysey inay heestani mid ayada ka hadlaysa sidoo kalena waxay ka dhigatay hadal hays ay mar kasta ku celceliso hadii ay meel marayso ama shaqaynaso waxa ay ka dhigatay wax ay isku dhaafiso hawl maalmeedka guriga iyada oo qaadaysa intaa hore ee heesta. Iyada oo goor galab ah iska fadhida guriga xagiisa hore oo qaadaysa Heestii ayaa waxa meesha soo maray Walalkeed wuxuuna maqlay luuqada heesta ay ku celcelinayso waxana uu ku yidhi Sagaleey miyaadan ilaawin wiilkii sootii laguu sheegay mahan inuu inaga hooseeye walaley ma waxad doonaysaa in aad noqoto inan deris la ah qof qabuuraha mar hore loo hooyey oo manta inaga hooseeya ogowna hadii uu maanta kula hadli karilahaa wuxu ku oran lahaa iska kay ilow oo nolol cusub samayso adiguba waa intii aad ku oran lahayd hadii aad ku oran kari lahayd.
Markaa ayey soo booday oo tidhi kawaran hadiise uu nool yahay Ahmedow. Markaa ayuu kugu jawaabay hadii uu nool yahay anigaa kaa balan qaadaya in aan kugu garab istaago sidii aad u heli lahayd lakin adiguna iga balan qaad ninkaa dhintay inaad iska illowdo mida kale miyaad illowsantahay in aabe keliya sugayo inta aad ka caafimaadayso ee wiil debeda ku maqan lagugu dari doono kaas oo markaa afrikadanba ku

dhaafinaya kuuna ka xaysanaya debeda halkaa oo aad nolol aad u qurux badan ku geli doonto. Inta ay booday oo sidaa u eegtay bay tidhi Ahmedow walal masidaa ayaa wada dhalasho inagaga dhaxaysaa oo aad cadowga ii siinaysa. Markaa ayuu yidhi hada qofka cadowga isisiinayaa waa adigee annaga mahan waxa cadowga ku siinaya waayo inan ka aad jecelaatay wuxuu ahaa reerkii dhiigu ina dhex yaaley ee weliba rageena barqada laayey ma sidaa ayaad markaa aniga ii leedahay cadow baad isiin. Sagal baa ku jawaabtay walal Jacaylku ma yaqaan Qabiil mayaqaan ina hebel iyo weliba ina eedo ee isagu hadii uu kugu dhoco waxad u tahay maxbuus daawadiisuna tahay in uu helo keliya qofkii uu jecelaa markaa walal maxbuus baan haye I taageer.

Markaa ayey hadana waxay soo qabsatay
**heestii Ahmed mooge ee ahayd**

- **Itaageer allahayow**
- **Arintaydan kala taal**
- **Adaa toosin karayee**

Isaga oo aan Ahmed weli halkii ka dhaqaaqin ayey Sadex jeer oo isku xiga intaa ku celcelisay markaa ayuu yidhi wallaaley illahay haku taageero anna waan kula dadaale oo ninkaas hadii uu nool yahay waxan kaa siin akhbaar intay dhoola cadaysay bay tidhi ilahay adigana ku taageer hadii aad i taageerto.

# SAGAL IYO SAKARIYE

Waa ka dhaqaaqay Sagal malin walba waxa ay dhegaysataa heeso iyada oo markaa dhalada guriga intay geysato iskaga maa weeloota galbihiina waxay aadaa Nimco oo waxay wada raadiyaan Sakariye. Waxay hawshi sidaa u socotaba waxa maalintii danbe Sagal u yimid Aabeheed kuna yidhi Aabe wiil baan reerkoodii isku afgaranay inaan kugu darno hana iga diidine ila eeg wiilkan horta waa wiil wax bartay sida adiga oo kale waana nin masuul ah sidoo kale waa nin dhaqaale fiican u soo hoydo wuxuuna haystaa shirkado badan oo dal iyo debedba ka shaqeeya. Waxay ugu jawaabtay Aabe inta aanan ku diidin anigu ma warshed ganacsi baan ahay mise ruux la jecel yahay oo wixii isaga uu jecel yahay lala eegayo hana i khalad fahmin aabe waxa laga hadlayaa waa masiirkii mustaqbalkayga waa in aan anna ka hadlaa Aabe. Odaygii intuu xanaaqay oo wuxuu sameeyo garan waayey ayuu Sagal dhurbaaxo qaado ku dhuftay yidhina anaga nooma taliso inan yaroo la kool kooliyey waxasna waxa kuugu wacan waa hooyadaa lakin anigu waxas yeeli maayee wiilku waxa uu imaanayaa ayaamahan soo socda markaa waa in aad is diyaarisaa hada in aad bogsatay waan lasocdaaye. Mudo yar gudahoodna waxad ka degi doontaa wadanmadaa shisheeye oo waxad noqon qofka Afrika mar danbe lagu arkidoonin xitaa Somaliya ku darsoo. Intay Baroor qabsatay oo wax aysamayso garan weydey ayey waxa ay kaga dhegtay illahoow i banbaani oo meel uun aduuunka iigu sheeg halka uu ku danbeeyey Sakariye. Dhanka kale Sakariye waxa uu raadintii weli ugu jiraa

# SAGAL IYO SAKARIYE

Sagal sidoo kale Rooda iyo Sumayana waa wada hadleen oo Sumayo ayaa waxa ay la hadashay reerihii deriska ahaa waxayna soo ogaatay inay Sagal Jirto xagaa iyo Itoobiya sidoo kalena loo qaban qaabinayo in loo guuriyo wiil ay Aabeheed is yaqaaniin kuna nool dalka debediisa. Lana sugayo inta wiilku ka imaanayo Itoobiya. Sakariye walaashii waa Roodee waxay si toos ah ugu carartay Sakariye una sheegtay sida xaalku yahay iyo in Inantii Sagal ahayd lagu sheegay Xaagaa iyo Itoobiya sidoo kalena Guurkeedii la qaban qaabinayo. Sakariye waxa uu kala garan waayey inay walashii ku ciyaarayso iyo in kale intii ay Rooda u tebinaysay hadalkana waxa uu lahaa ilahow been ka dhig laakiin markii ay hadalka u dhamaysay ayaa hawli timid. Oo Sakariye ayaa waxa uu go'aansaday inuu aado xaagaa iyo Itoobiya weliba isaga oo dhaawac ah, waxaana khilaaf dhex maray isaga iyo waalidiintii oo markaa ku diidaay inuu u safro xagaa iyo wadan kale maadaama uu yahay nin aad dhaawac u ah lakin Sakariye waa ku gacan saydhay oo wuxu yidhi hooyo iyo Aabe anigu go'aan kaygu waa cad yahay waxa aan idinka rabaa waa duco iyo inaad i anbabixisaan si aan jacayl kayga u soo dhacsado. Lakin hooyo waaba la fahmi karaaye yaa Aabe fahmi kara oo wuxu iska soo jaray aniga naftaada iiga qaalisan inan yaroo reer dhalay wax aad tegaysaana ma jirtee bartaadaa joog wax runta kuu sheega ayaad waydeye mida kale iyaduba may ku soo raadiso ma adiga uunbaa lagu yidhi wax raadi. Dhulka in ku leeg fadhiiso inan kaagan yari mid kibirsan baad u eeg tahaye waana iskaga dhaqaaqaay. Sakariye arintii ayaa

kusoo afmeerantay isaga oo aan hadal kale qaadan karin oo aad cadho uga buuxdo wuxuna go'aan saday in uu cidna la socod siin marxalada ama qorshaha uu markaa damacsan yahay oo uu markaa iska tago isaga oo aan cidna wax la wadaagin. Lakin taka hoos baxsanayd ayaa ahayd inuusan markaa wax dhaqale ah oo ilaa iyo Itoobiya wadaya inuusan haysan sidoo kalena u baahan yahay taageero buuxda oo dhan ehel iyo asxaabba ah laakiin mahan nin waxaasi hor istaagayaan waayo muhiimadiisu waxa keliya oo ay ahayd inuu isagu helo Jacaylkiisii Sagal. Wuxuuna go'aan ku gaadhay taageero la'aan iyo Taageeraba in uu nin taga noqdo cid danbena uusan wax ka dhegaysan. Sagal dhanka kale tallo ayaa ku cad oo wax allaale iyo wax ay samayso ayey garan la'adahay laakiin Nimco Ayaa waxa loo soo sheegay inay wiilka ay raadinayso uu dhakhtar Xamar ah uu ku jiro halkaasna uu ku danbeeyey lakiin uusan dhiman oo dhimashada magaalada loo soo gashay ay been ahayd. Nimco waxa ay arintii la wadaagtay Sagal oo wax ay Samayso garan la'ayd lakin Sagal hadana waxa u beryey waa cusub oo waxay heshay qiil ay aabeheed ku qabsato sidoo kalena khal khal ay ku abuurto arinta odaygu wato. Isla markiiba waxa ku soo dhacday walalkaa soo kuma lahayn anigaa ku garab istaagaya. Hadaba isaga arintaa kala xaajood oo uga war bixi in uu nool yahay ninkii Sakariye waana ku dhaqaaqday oo waxay aaday walalkeed arintiina waa uga warantay inta uu cabaar aamusnaa oo fekeray ayuu yidhi oo Sagaleey hada waxad hubtaa ninkaasi in oo nool yahay

dunidanna meel ka joogo say tidhi walal dunidanba maxad iskugu wada qaadi waxanba ku iri wuxu hada joogaa Xamar waxa aan u baahanahay waa garab istaagaaga iyo inaad iga caawiso sidii aan ku heli lahaa Sakariye. Wuxu ugu hadal celiyey waa yahay hadaba bal ii sheeg qorshaha aad damacsan tahay si aan kuula eego. Sagal ayaa ku jawaabtay walal anigu hada wax qorshe ah ma dejine adigu maxad igula talin lahayd kana soo qaad adigoo boos kayga taagan yacni qofka ay wax ku dheceen adigoo ah. Waxa uu ku yidhi walalo tallo waxan ku siin lahaaba waan waayeye adigu aniga maalmo iga war sug si aan qorsho kugu sameeyo Sagal baa ugu jawaabtay maalmo aa walal soo ma ogid ninkii Aabe ii wad waday inuu soo socdo maalmo ayad ka hadlaysaaye xitaa saacado kuma sugi karo walal ee wax i dheh si aan anna uga fekero. Ma sidaabaa haa walal. Hadaba waxan oran lahaa Sakariye aan la hadalno kedibna aan niraahno kaalay Itoobiya. Intay soo booday bay ugu jawaabtay walal ma sidaa oo dhan ayaad u naxariis daran tahay wiilki dhakhtar buu ku jiraa waana dhaawac culus qofka manta meel mari karaayi waa aniga ee isaga mahan walal wax ila qabo. Intii madaxa ruxay oo wax uu ku jawaabo garan waayey buu yidhi oo hada waxad ileedahay aniga i dir? War miyey waalan tahay ta yari mise anigaa is moodsiiyey ma meeshaa anan ruuxna ka aqoon ninka aad doonaysana ku qabin baan iskaga kaa diraa. Sagal baa ugu jawaabtay hadaba waayehee adigu irraac adaa walalkay ahhe oo manta meel walba illa mari kare sidoo kalena wax kasta kala fahansane

walal waan ku baryayaaye haydiidin. Haye waa yehee walalo isug laba maal mood si aan wax inoogu habeeyo. May may walal ma sugi karnee aan beriba baxno si waan wakhtigu inooga lumin oo aaynan u habsaamin. War bal yaabkan kaalaya intii yidhi buu ku yidhi haye waayahay. Waxa ay ku noqotay wiilkii nabar aad u culus sidoo kalena ka feker badan u baahan hada wakhti uu ku fekero ma haysto oo Sagal baa deg degsan. Waxa uuse go'aan saday inuu raaco ilaa iyo halka u danbaysana uu soo ogaado. Subixii ayey ku soo kalahday kuna tidhi anigu diyaar baan ahay ee ina mari markaa ayuu ugu jawaabay allah walle waxan ilaaway inaan inoo jaro tigidadii say tidhi ma anigaaba kugu haleeyey anigaa jaray shalaye galabta ayeynu ku qoranahay diyaarada. Yaab bay kaga soo hadhay wiilkii wuxu yidhi haye waayahay. Galabtii ayaa la soo baxay waxana la yimid garoonka diyaaradaha waxana la soo raacay diyaaradii u soo socotay Somaliya gaar ahaan Muqdisho. Dhanka kale Sakariye isana waxbuu isku habaystay oo wuxu go'aan ku gaadhay inuu soo aado xagaa iyo Itoobiya sidoo kalena waa dhaawac oo waxa u socda daawooyin. Isla galabtii ay soo duuleen ayuu isna Xamar ka duulay oo Itoobiya afka Saaray. Halkaa waxa ka dhacay is dabamar oo midba midka kale magaladii uu ku ogaa ayuu u daba maray. Sagal iyo walalkeed waxa ay ka soo degeen Garoonka Aadan Cade. Waxana ay afka soo saareen xagii ay taagnaayeen baabuurta Taxida ahhaa waxayna ka kaxaysteen mid taxiile ah. Lakin waxa uu ku noqday tuug oo wuxu kala cararay alaabtii marka

laga reebo boorso uu gacanta ku hayey wiilku. Halkaas wax khasaare ah mooyaane wax kale kama faa'idin waxay iska ka xaysteen mid kale oo magaalada geeyey halkaa ayey Hotel ka degeen mudo maalin iyo habeena markiii ay Hotelka degenaayey ayey waxay go'aansadeen inay raadiyaan wax magaaladoodii ka yimid si ay markaa ula hawl galaan oo ay Sakariye u raadiyaan. Sakariyena waxa uu ka soo degay Garoonka diyaaradaha ee Caasimada i toobiya Ee Booli Makaa'iil.

## SILICII IYO GAAJADII ITOOBIYA

Sakariye markii uu ka soo degay garaanka Itoobiya waxa uu toos ugu soo dhaadhacay xagaa iyo magaalada isaga oo markaa ka degay Hotel yar oo qiimo jaban ah maadaama uusan lacag badan haysan wuxuuna isku deyey inuu magaalada isla habeenkiiba dhex galo oo ka raadiyo Sagal ama markaa wax uu ka garto magaalada wadanku waa wayn yahay sidoo kalena dadku waa dad aad isku jiidhaya Sakariye waa dhaawac aan weli si wanaagsan u wada bogsan sidoo kale waxa u dareemayaa daal aad u badan oo intii uu diyaarada soo saarnaa iyo soo jeedistii faraha badnaa ayaa madax xanuun ku furay sidoo kalena daawooyinkii uu qaadan jiray waa soo ilaaway oo muusoo qaadan. Xanuun aad u badan ayaa qabtay waxana uu iskaga soo laabtay Hotelkii waana iska jiifsaday.

# SAGAL IYO SAKARIYE

Saacado badan wixii uu marba dhinac isku rogo oo uu ka fekerayo Sagal markaana wehelinayo welwel ayaa waagii u beryey waxuuna usoo baxay debeda si uu markaa hawshiisii u guda galo isaga oo ku xisaabtamayana wakhtiga iyo saacad kasta maadaama lacagtu ka yar tahay waxana subaxaa quraac u noqotay xabad roodhi ah oo uu ka gatay meherad ku hortaalay Hotelka waxa uu isku deyey meelaha soomaalidu u badan tahay in uu raadiyo si uu uga eego qof uu markaa garto oo caawiya. Wixii uu magalada ku dhex wareeraba waxa uu helay wiil dhalin yaro ah oo soomaali ah waana waraystay sidoo kale waxa uu u sheegay inuu ku cusub yahay magaalada raadinayana meelaha Soomaalidu ku badan tahay. Wiilkii yaraa yaa ka kexeeyey waxaanuna geeyey meelaha soomaalidu iskugu timaado laakiin nasiib darada ayaa ah waa laba meelood oo aad u kala fog hadhowna waa inuu keligii halkan yimaadaa. Waa uu iska calool adayga oo dib ayuu ulaabtay maadaama uu arkay meesha dhalinyaro uu gartana ka waayey wuxu dib ugu soo laabtay halkii uu ku noolaa. Waxana uu go'aan saday in uu isla hadaba guuro oo uu inta aanay habeen badh noqon uu aado xaagaa iyo Soomaalida. nasiib darose waxa jidka ka helay qolo jiri ah waxayna ka baadheen wixii uu watay kana qaadeen dhamaan wixii uu hanti haystay ee wanaagsanaa sida xoogaagii lacagta ahayd telefankiisii gacanta iyo xoogaa dhar qurux badan oo uu sitay sidoo kalena waa la kala riday oo can jabnayd yaa sii kala dhacday. Sakariye waxa ku cadatay tallo maadaama uusan haysan wax internet ah iyo telefanba,

xaalkiisiina waxa uu isku bedelay daqiiqado yar gudohood maadaama uu yahay nin dhan kasta hada u cadiban, haday dhaqaalo noqoto iyo haday xidhiidhkii dadka kale uu lalahaa kala go'ay taasna waxa la oran karaa waa qof god'oomay. Sakariye niyadiisii samayd ee uu hayey waxay ku soo uruurtay rajo xumo dhan kasta ah lakin waxa uu mar walba rajadiisu ahayd in uu helo qof ka caawiya raadinta Sagal. Wax ay saacad maalin iyo billo isku dhiibaanba waxa uu noqday qof rajo xumo ka taagan helida Sagal oo isku daygii ahhaa inuu helo qof caawiyana waa soo xumaatay wax lacag uu markaa haystayna ma jirto waxay dantu ku keliftay in uu noqdo qof derbi jiif ah quudkiisuna yahay waxa dadku meelahaa ku soo qubaan. Sagal iyana isla maalmiihii waxay ay galaan raad raacii Sakariye lakin waxa ay markiiba heleen inantii ay saxiiba ahaayeen Sagal ee Sumayo waxayna kawada sheekaysteen wixii dhacay iyo jawiga hada sida uu yahay Sumayo markiiba waxa ay tidhi war isuga waxan wacayaa Sakariye walaashii Roodee. Waa wacday unna yeedhay oo tidhi noo kaalay waa laysku yimid waxana laga waraystay Sakariye arintiisii isoo kalena waxa la baray Sagal Halkaa waxa isku bartay Sagal iyo Rooda waxana ay uga warantay in Sakariye la waayey mudo hada dhawr maal moodana la'ayahay. Wax ku dhacayna lama sheegin lakin waxa loo badinayaa in uu Itoobiya aaday oo uu adiga ku raadiyey maadaama aan anigu u sheegay in aad Itoobiya joogto. Sagal waa soo booday oo tidhi oo sootuu dhaawaca ahaa miyuu bogsaday durba. Rooda ayaa ugu

jawaabtay maya muusan bogsan lakin cidna wax waa ka dhegaysan waayey xitaa daawadiisii wuxu kaga tegay guriga oo muusan qaadan waxana aan aad uga wel welsanahay sida uu noqon doono bilaa daawadiisa. Sagal go'aan deg deg ah ayey qaadatay waxayna go'aan ku gaadhay inay isla galabtaba u duusho Itoobiya waxana kasoo horjeestay walalkeed oo ku yidhi innana waa layna raadinayaa adiguna waxad nagu celinaysaa meel laynaga raadinayo waxayna ugu jawaabtay walal yaanay wax kaa khaldamin wixii aan u nimi maanta waxa uu ku sugan yahay Itoobiya waana in aan halkaa ka raadinaa. Inta uu istaagay ayuu yidhi ma aaminsan tahay hadii Aabe hada ku arko in uu ku daynayo sidoo kalena waad ogtahay in Aabe radin kale kugu wade walal waan ogahay wax kasta mana aan ilaawin lakin wixii dunida iigu qaalisanaa ayaa halkaa iga jiree side yeelaa adigaan ku waydiiyee. Waxa uu ugu jawaabay waa yahay hadii aad sidaa go'aansatay waan baxaynaa laakiin wixii Aabe hadhow kaaga yimaada aniga mahan kuna darsoo ninkiina waa lagula sugayaa. Inta ay cabaar aamustay ayey tidhi diyaar walal. Waxa ay iyaguna dib ugu laabteen Itoobiya. Sidoo kale waxa itoobiya yimid wiilka hooyadii iyo walaashii oo raadinaya isaga. Waxana laysku deyey in gebi ahaanba magaalada Jigjiga laga dhex raadiyo lakin nasiib darada ayaa ah in wiilku uusan ka degin Jigjiga ee uu ka degay **Addis Abeba** caasimada dalka Itoobiya. Sagalna markii ay sidaa garoonka tiyaaradaha uga soo degtay ayaa Aabeheed gacanta ku dhigay wiilkii walalkeedna waxa lagala duldhacay canaan iyo

maagis waxana iydana lagu war geliyey wiilkii inuu imaandoono maalmahan soo socda oo uu baaqday markii aad Xamar aaday. Waxana Aabeheed ku yidhi wax hadal danbe oo aad igu soo celin kartaa yeysan jirin. Sakariye waxa uu Addis Abeba dhex balanbalaba oo uu derbi jiif noqdaba waxa uu hadana ku darsaday gacantii dhaawac ahayd oo iyana kala xumaatay yacni si khladan u kabantay. Wuxuuna ku danbeeyey inuu maalintiina hudheelada somalida cunto waydiisto habenkiina uu iska seexdo meelahaa. waxa ay sidaa ku socotaba maalmo ka bacdi labadii dhinac ee wiilka raadinayey midna kuma guulaysan in ay helaan hooyadii iyo walaashii waxa hadana loo sheegen wiil laga helay xamar oo mayd ah lana garan waayey cida uu yahay markaana ay ku noqdeen Muqdisho si ay u soo hubiyaan arintaa. Sagalna waxa loo guuriyey ninkii debeda ka imaanayey waxana loo qabtay Aroos laakiin ay iyadu iska maqane jooga ahayd.
Markii ay Sakariye Hooyadii iyo walaashii tageen xagaa iyo Xamar ninkii la sheegayey ee ay moodayeen wiilkoodii ma uusan noqon waxana uu noqday nin markaa aan la garanayn arintaasina waxa ay noqontay mid lagu hungoobay isla markaana waxa samri weydey Sakariye Hooyadii oo ay ku muusa nawday Allah sakariyow miyaan ku waayey. Waxana ay billowday eraya yar yar oo ay isku gaysetey inay maalin walba ku celceliso iyada oo is moodaysa inuu maqlayo ayey maalin iyo subax kasta ku celicelin jirtay eraydan hoos ku qoran.

- **Sakariye inan kaygiyoow**

# SAGAL IYO SAKARIYE

- **Sidee baad hooy wax tidhi**
- **Sasabo noloshaydi iyo**
- **Sammirkii waan gabee**
- **Sakariyow inan kaygiyoow**
- **Xagee baad iga jirtaa**
- **Sawdkii hadalkaaga iyo**
- **Sawirkaagii baan tebee**
- **Sakariye inan kaygiyow**
- **Sarkaalkii aan dhow**
- **Sadriga kii igaga yiil**
- **Sanado badan aad maqnayd**
- **Sadkii anfacada ka go'ay**
- **Soojeed waagii ku bari**
- **Sokeeyana waan necee**
- **Sakariye inan kaygiyoow**
- **Sadrigu waa kula tegee**
- **Sarkaal kii aan dhalow**
- **U soo noqo hooyadaa**

Mar kasta oo ay intan tidhaahdo waxa ugu degi jirtay niyada oo waxay is oran jirtay wuu kuu imaan doonaa maalin uun. Dhanke kale Sagal waxa ay noqotay inan marwo reer ah oo waa lala aqal galay sidoo kale wiilkii guursadayna waxa uu ku noqday dalkii uu ka yimid oo waxa uuna ku dhaqaaqay inuu markaa diyaariyo qorshihii uu kusoo ka xayn lahaa Sagal

isaguna waa nin illahay wax lawade wax kastaaba si fudud ayey ugu hir galeen waxa uu xereeyey dacwadii isla markaana waaba loo ogolaada iyada oo markaa sanad ka soo wareegtay isla markaana ay uur leedahay waxa dhacday mudo ka bacdina waa soo laabtay oo qorshihii buu u dhameeyey waxana laysku raacay xagaa iyo Amerika inantii Sagal oo samir ka dheer yahayna waxa ay noqotay hooyo qurba joog ah.

## HELLIDII SAKARIYE IYO DHAAWICII WAALIDA

Sakariye weli isagu waa nin dhex wareegalaysanaya Itoobiya dhexdeeda oo wuxu raadin ugu jiraa qof mar hore dalka ka tegay Sakariye waxa uu dhex galay oo noloshiisii ku luntay dadka aan wanaagsanayd sida kuwa xabaglayaasha ah iyo kuwa meelahaa darbi jiifka ah ee aan cidana ka danbayn mudo Sakariye wixii uu sidaa ku jiraba waxa ay noloshiisii iskugu soo biyo shubatay in uu samro oo uu aamino in uusan dib oo u danbaysa uusan u heli doonin Sagal waana raja dhigay ugu danbayntii. Waxa uu ahaa nin meelihiisaa iskaga nool oo aan waxba isla hayn Sakariye mudo sidii uu sidan ahaa ayaa goor galab casar liiq ah waxa ka soo hor baxay wiil ay isku magaala ahaayeen waxana wiilkii isku qabtay ninkani in uu yahay Sakariye iyo in uu qof kale yahay sidii uu u eegayey ayaa waxa dareemay in la eegayo Sakariye waxana uu isna si wacan u eegay wiilkii isaga ayaana gartay oo intuu soo booday ayuu

yidhi war walal miyadan hebel ahayn oo intuu yaabay yidhi aduguna miyadan Sakariye ahayn waa lays gartay wuxuuna ku yidhi war niyo Sakariye maxaa sidan kuu galay walal bal ii waran waa lays waraystay Sakariye Maskaxdiisu waa caadi oo waa ninkaa wax kasta kala garanaya wuxuuna ku yidhi ninyahow meeshan mudo laba sano ka hor ah ayaan imi waxana u immi innan aan is jecelayn baa meeshan laygu sheegay mudo iyadaan baadi doonayey lakin hada sida ay u muuqato ma ahan qof aan heli doono oo waan ka quustay wadankiina niyohow in aan ku noqdo ma doonayo Sagal la aanteed maxay ii sheegaysaa nolosha aan ku jira waxa ii dhaanta in aan iska joogo meel aan cidana iga garanayn. "***Fiiro Gaar ah,*** *Halkaana waxa ka cadaatay in Sakariye uusan xitaa dib iskugu deyin in uu ku laabto dalkii maadaama uu yahay nin rajo dhigay".*

Wiilkii ayaa uga sheekeeyey waxa uu duni ka ogyahay iyo in uu maqlay in lawaayey Sakariye. Waxanuna yidhi war nin yahow aan kuu waramo inanta aad ka doonayso wadankan ma joogto oo mudo waaba sii maqan tahay oo waxay jirtaa xagaa iyo Amerika adigana sidii laguu baafinayey waa daaleen ehel iyo xigaalba mida kale waxa dhacday xitaa inay Sagal timid Muqdisho markii aad baxday oo ay mudo ku raadinaysey kaana soo hadh gashay markii ay soo laabatayna waxa lagu daray nin guursaday oo waxay hada ku sugan tahay Amerika sidaa aan kuu soo sheegay inantaasi ku daysaye kaalay oo dalkii iskaga

laabo oo kasoo dhexbax waxan aad ku jirto aniga ayaana dadka kuu soo sheegaya Meesha aad joogto iyo in halkan aad ku dayacan tahay wallale.

Sakariye waxay kaga dhegtay waa laguursaday aa. Oo waxaba jabtay qalbadii hadal danbena waa laga waayey wiilkii oo la fadhiya ayuu dhaqaaqay isaga oo leh Sagal waa laguursaday. Wuxuuna markiiba boobay eraya uu isku geystay isaga oo markaa laxamaysanaya wuxuna yidhi sidatan

- **Sagal guurkii baw dhacay**
- **Ana gabalkay baa dhacay**
- **Cadow caashaq bay helay**
- **Haadaamo iga riday**
- **Hogag dheerna ii qoday**
- **Ehelkayna waan nacay**

Intaa markii uu tiriyey ayuu hadana waxa uu soo qabsaday heestii **Xasan adan Samatar** (*Gaari waayay taan rabay*) isaga oo markaa ka qaadaya inta ugu horaysa maadaaba ay ahayd inta isaga ka qusaysa:

- **Hadiia aan go'doomoo**
- **Gaadhi waayey taan rabay**
- **Garbay noqotay caashaqa**

# SAGAL IYO SAKARIYE

- **In aan daba gurguurtee**
- **Xagaa gebi xaguna gebi**
- **Gudcur daaha soo rogay**

Wiilkii oo la hadlaya ayuu bartii kaga tegay wiilkii kamuusan hadhine wuu soo daba galay si uu u ogaado meesha uu u socdo wuxuu soo daba socdaba waxa uu soo galay meel qashin badan oo usgag aad u badan leh wuxuuna isku tuuray meel aad u liidata isaga oo ag jiifsaday dhaliyaro Itoobiyaan ah waxanuna u dhacay sidii qof xalay oo dhan soo jeeday Sakariye waxa uu fuulay doontii waalida waxana uu noqday qof xanuun kiisu yahay Sagal.

Wiilkii waxa uu isku dayey in uu hadaba ka war geeyo si loo soo badbaadiyo Sakariye maadaaba noloshan uu ku sugan yahay tahay mid khalaas ah. waxa uu raadiyey reerkii waana la xidhiidhay waxa uu la socodsiiyey sida ay wax u jiraan iyo in uu Sakariye helay uuna yahay maanta qof bukaan ah. Waxa markiiba diyaarad soo qaadatay Sakariye hooyadii waxayna timid isla magaaladii uu joogay iyada oo markiiba la xidhiidhay wiilkii kale waxana markaa uu tusay halka Sakariye ku nool yahay ama markaa hoyga u ah.

Hooyo waa Hooyee mar kii ay aragtay wiilkeedii xaalka uu marayo kuna sugan yahay waa iska muraala dilaacday oo iska muusa nowday. Waxba bedeli mayso muusanowe waxa ay ku

dadaashay inay bal isku sheegto markaana ay ka dhaadhiciso in ay tahay Hooyadii lakin Sakariye umuusan jawaabine intuu eegay ayuu iska dhaafay.
Sakariye hooyadii waxa ay go'aan satay hadaba wiilka inay ka kaxayso meeshan oo u dhigto meel dhakhtarna leh quraanna lagu akhriyo.

Laakiin Hooyo waxa ka baxsan waxa haya inuusan jin ahayne yahay Jacaylkii waalida ahhaa ee uu Sagal u qaaday islaantii waxa ay Samaysay inay markaa cid u doonato oo ay markaa ka kaxayso meeshan uu ku dayacan yahay. Waxana markaa ay heshay wiil ay qaraabo yihiin. Wiilkii qaraabada ahaayeen ayaa la dadaalay oo markaa warqado cadayn ah u sameeyey maadaama ay wixii uu xoglahaa oo dhami wada lumen intii uu Itoobiya joogay. Wiilkii Sakariye ahaa hada xaalkiisu waxa loo wadaa Somaliya iyo meeshii uu markaa ku barbaaray.

Dhanka kale Sagal waxa ay joogtaa Amerika waxana hada kasoo wareegtay mudo labo sano ah inta ay sii maqan tahay waa hooyo wiil yar haysata sidoo kalena uur leh. Waxayna ku dadaashay sidii ay nolosha Amerika ula qabsan lahayd oo waa qof aan wax badan ka dhex baran Amerika laakiin waa qof ku shaqeeya guriga dhexdiisa oo waxa shirkad kusoo xidhay ama baray ninkeeda oo markaa doonayey in uu mashquuliyo oo aysan ka fekerin wixii soo maray iyo nabaradii hore sidaa laajigeed Sagal waa qof mar kasta mashquul ah oo aan wakhti

badan hayn si ay uga fekerto wixii soo baran laakiin mar kasta waa qof xasusan wiilkii Sakariye ahaa oo mahan mid hilmaamaysa wixii soo maray iyo noloshii quruxda badnayd. Ninka Sagalna waa nin degan oo aan dhib badnayn lakin iyadu waa mid mar kasta xasuusan Jacaylkeedii ay seegsay sidoo kale waxa ay mar kasta xasuus qurux badan u ahayd ama ay kusoo celcelin jirtay wakhtigii quruxda badnaa ee ay soo wada qaateen iyada iyo Sakariye mar walba oo jacayl laga sheekeeyana waxa ay noqotaa qof iska ilmaysa oo ka fekerta Sakariye iyo waxa uu ku sugan yahay. Lakin Sakariye in uu nool yahay waa ogtahay se dhibta jirta ayaa ah waxa sanad iyo badh ka hor loosoo sheegay in Sakariye laga samray oo sidii loo la'ayahay. Mar kasta oo ay Sakariye xasuusato waxa ay niyada ka tiraahdaa waa anniga qofka dhibtaa oo dhan u geystay danbiiluhuna waa anni waayo hadii anan jacaylka ku abuuri lahayn maanta waxa uu ahaan lahaa nin nool oo nolol qurux badan haysta.

Sakariye waa qof maanta bukaana waxana loosii wada Magaaladii uu ku dhashay waa halkii uu Sagalna ku bartay lakin maanta nin waxas oo dhan kala garanaya mahan marka laga reebo intii yarayd ee uu ku soo cel celin jiray ee ahayd:

- **Sagal guurkii baw dhacay**
- **Ana gabalkay baa dhacay**
- **Cadow caashaq bay helay**

# SAGAL IYO SAKARIYE

- **Haadaamo iga riday**
- **Hogag dheerna ii qoday**
- **Ehelkayna waan nacay**

Sakariye oo ah ninka xaalkan ku sugan waxa laga rogay ama la geeyey magaaladii uu ku dhashay waxana uu yahay qof maxbuusa maadaama aan la ogolayn in uu keligii socdo lagana baqayo in uu dib ugu laabto meeshii laga keenay.
Sakariye sidii loosoo waday waxa lagu riday Qol xabsi ah oo loogu tala galay in markaa lagu dabiibo laguna cilaash saaro. Sakariye waxa loo qoray wadaado gabal dhac iyo waa beri quraan uu ku akhriya. Bal in wax yarina ay iska bedelaan noloshiisa oo uu wax kala garto.

Dhanka kale waa Sagal'e Saaxiibteeda Sumayo waxa ay ka war heshay in Sakariye la helay xaalkiisuna yahay qof waalan waxa keliya ee afkiisa ka soo baxayaana ay tahay Magaca Sagal iyo in laguursaday Sagal.
Intaasi markii ay soo gaadhay ayaa waxa ay wacday Sagal si ay ula wadaagto waxa soo kordhay iyo Ninkii Sakariye oo waalan lagu hayo magaaladii ay kusoo wada barbaareen.
Nasiib daro'se ismanan helin maadaaba Sagal tahay qof aad u mashquul badan sidii aan soo sheegnay marna waa Shaqaale marna Caruurteeda la tacaasha sidoo kale ay hada tahay qof samirtay oo aan inta badanba dhaadin ama aaminsanayn in Sakariye maanta aduunka Saaran yahay.

# SAGAL IYO SAKARIYE

Inantii Sumayo'se maysan samrine waxa ay hadana soo wacday Sagal oo markaa Xaafada joogta waana ka qabatay waxayna uga warantay sida wax u jiraan iyo in ninkii Sakariye la helay isaga oo waalan magaceeda keliyana ku dhawaaqa. Sagal waxay u noqotay maalin maalmaha kale uga duwan laakiin marna waxayba ku noqotay naxdin oo wiilkii naftiisa khatartaa oo dhan u maray ayaa ay iyana hooyo ka tahay oo ciyaal iyo Odayba haystaa waxay noqotay qof marna is ciil kaanbiya marna farxad la jeelan. Waxa ay Sumayo ku tidhi Sumayooy waxad ii samaysa meel aan kala soo xidhiidho ayaan rabaa Sakariye ee wax telefan ah ma ka haysaa mase ii raadin kartaa waxay ku tidhi haa oo waxanba hayaa walaashii waxayna tidhi isii telefankeeda markii ay telefankii kala qorteen ayey toos u wacday Sagal inantii kuna tidhi waa Sagal ee Sakariye iigu dhiib. Waxa ba ay noqotay shoog inanta iska soo hadashay markii wiilkii la helay sidoo kalena iskaba guursatay iyadu. Waa ku xanaaqday oo ku tidhi waxba kuugu dhiibi maynee noo daa telefanka yaga oo mar danbe haysoo wicin hadii kale wixii ku dhalay baan kaaga dacwoon hanaga kaa qabsadeene. Sagal waa bariday oo tuugtay kuna tidhi Allah wallahay waan Jecelahay Sakariye ilaa hada ee walaley iigu dhiib waan ku baryeyaaye aan keliya hallow iraahdee waana uga dhaaratay inay ugu dhiibto waxayna ugu caga juglaysay hadii aysan telefanka u dayn inay uga dacwoon doonto cidii ka masuulka ka ahayd waana ku damisay telefankii. Sagal hadaba

waxa ku cadaatay tallo wax ay samaysana waa garan weydey waxayna daniday inay ku dadaasho bal inay hal mar la hadasho Sakeriye una sheegto inuu Sakeriye yahay Jacaylkeedii koobaad isaguna yahay qofka baray macnaha jacaylka sidoo kale waxa ay ku dadaashay inay Sumayo ku dhahdo igala hadal walaashii si ay iigu gayso waxayna ku tidhi Roodana sidii si leeg weliba iyada oo u garnaqsatay kuna tidhi intii walalkay balan balayey iyadu waxay daryeelaysey odaygeeda iyo ilmeheeda halka walalkay kudaafahada seexanayey iyadu waxay ka soo tooseysey guri qasri ah halkii uu isagu kartoonka ku seexanayeyna waxay iyana ku seexanaysey sariir lookala bixiyey marka iga daa qoftaas walalkay halkaa maanta dhigtay waa iyadee. Wax lagaga dhaadhiciyo ayaa la waayey si ay ugu geyso telefanka Sakariye laakiin Sagal mahan ruux samraya oo waxay isla markiiba la xidhiidhay Qollo Khayri ah oo dadka aan waxba haysan caawiya waxayna ku tidhi waxan rabaa Qoys in aan lacag idiin mariyo oo aad iga gaadhsiisaan waana lacag khayri ah oo aan ahayn mid si kale ah waxaana rabaa inaydaan magacayga u sheegin. Waxayna bil kasta u marin jirtay lacag haayadaa khayriga ah waxana markii ay mudo ka soo wareegtay ka shakiday lacagtan bil kasta ay soo dirayso haayadu inantii la dhalatay Sakariye waa Roodee waxayna is weydiisay horta haayadan khayriga ah maxay bil kasta lacagta inoogu soo diraan dadka kaleba sidaa uguma soo diraane waxana markaa aaday hooyadeed uu ku tidhi hooyooy lacagtan intan leeg maxaa bil walba laynoo siyaa? Markaa ayaa islaantii

tidhi hooyo illahaybaa xalkeena oggoo midhaa sidaa ayey inoo siyaan oo waa dad illahay inoo soo diray hooyo. Waxay ugu jawaabtay may may hooyo waxani ka wayn haayad bil kasta lacag bixisee ee waa lagu lamaan yahay anigaana soo ogaan doona waayo waxan is weydiiyaa sababta ay dadka kele u siin waayeen oo ay inaga bil kasta inoo siiyaan lacagta intaa leeg. Islaantii waxa ay ku jawaabtay wax adiga kaa wayn layskuma mashquuliyee hooyo iskaga hadh arintaa oo orad oo wiilka soo eeg xaalkiisa. Waa ka dhaqaaqday lakin mahan qof intaa ku istaagaya tayariye waxay isku sii deysey isla markiiba haayadii kuna tidhi iyada oo is qarinaysa. Bisha danbe walashay waxay idinku tidhi lacagtii aan idiin soo diri jiray idiin soo diri maayee anigaa caadi ugu dirayee waad mahad san tihin. Isla markiiba waxa soo booday nin oo yidhi oo miyey tollow la soo hadashay reerka markaa ayey tidhi ma Sagal suu yidhi haa say tidhi war waad mahadsantahay anigu Sagal walaasheed ma ahiye waxan ahay qof rabay in uu ogaado meeesha lacagta laga soo dirijiraye waadna ii sheegtee mahadsanid.
Ragii waxa ay ku noqotay geeri iyo naxdin waxay ku hadlaana waa garan waayeen waxayna baryeen inantii oo dheheen ader arintaa aad afkayaga kala soo baxday cidna hawsheegin sidoo kalena ader iska illow arintaa oo waan ku baryeynaaye hanna ceebayn ader. Waxana ugu jawaabtay anigu idinka idinma haystee waxan haystaa qofka lacagta anaga noo soo diray waxana rabaa in aan la xisaabtamo una sheegi maayo in aan idinka idinka maqlay ee waxan oran waan iska soo ogaaday

waana ku dadaalayaa in aydin idin dareemin laakiin waad mahadsantihiin adeerayaal.
Waxana isku sii daysey gurigii oo waxay soo qabsatay markiiba Mobile keedii waxayna wacday Sagal lakin maysan heline waxay ay is heleen Sumayo waana ay ku qaylisay oo ku tidhi waxas oo dhan adigaa noogu wacan Somayooy oo hadii aadan waxba u sheegi lahayn waxasi maysen dheceen. Sumayona waxay isku daydey inay is banbaaniso una sheegto iyadu inaysan ka shaqaynay wax xune laakiin ay rabtey inay saaxiibadeed wax ogaysiiso.
Waa ku jartay oo waxay wacday hadana Sagal lakin hadana ismaysan helin Sagal maadaama sida aan soo sheegnay Sagal inay tahay qof aad u mashquul badan oo wax yaabo badan isku haysa saacado ka bacdi Sagal waxa la hadlay qoladii Jaliyada lana wadaagay sida ay wax u dheceen waxana fahan siiyeen inaanay iyagu waxas si ay ula jeedine Rooda afkooda kala soo baxday, Sagal waxa ay iska dareentay soo wicidan faraha badan ee Rooda innaanay wax wanaagsan ahayne ay ahayd cadho ay doonaysay inay ku qayliso Sagal ayaa wacday Rooda kedib u sheegtay inaanay lacagta u soo dirijirin ku wiirsashee ay ka ahayd inay rabtay inay caawiso Jacayl keedii. Rooda waa xanaaqday afkayna furatay waxayna ku tidhi Sagaleey miyaad hilmaansan tahay adigu inaad walaalkay waxas u soo jiiday oo maanta hadii aydaan is baran lahayn inaysan waxaasi ku dhici lahayn soo ma ogid. Sagal waa qaadatay Khalad keeda lakin waxay ugu dartay Rooda ha hilmaamin wiilku sida uu ii jecel

yahay in aan anna u jecelahay weliba aan naftayda u huri karo. Rooda inta ay is bedeshay oo xanaaqday ayey inantii ku qaylisay kuna jartay Telefankii. Sagal waxa ay Sameyso ayey garan waydey waxana wacday Sumayo waxay u sheegtay arintu halka ay marayso doonaysana inay soo tegto oo ay aragto xaalka Sakariye. Sumayo waxay aad ugu dadaashay inay ka dhaadhiciso inaysan imaan maadaama ay hada tahay qof marwo ah ninna qobo sidoo kale Hooyona ah, Lakin Sagal waxay war ugu soo gabagabaysay maanta hadii aan booskiisa ku jirilahaa waxan hubaa inuu isba intaa ii samayn lahaa oo uu ii imaan lahaa markaa wixii uu samayn lahaa ayaan anna maanta samaynayaa ee waad ku mahadsantahay Taladaada.

Sagal waxay ay markiiba goosatay Tikitkii ay ugu bixilahayd dalka weliba iyada oo aan markaa la socodsiin odaygeeda una sheegin inay wax damacsan tahay. Lakin intii aysan soo bixin ayey la hadashay una sheegtay sida wax u jiraan iyo daacad nimada waxa ay tahay oo ay doonayso inay ka soo laabato wadankii si ay u soo aragto Sakariye marxalada uu ku sugan yahay. Waa ka xanaaqay odaygeedii wuxuuna ku yidhi walaleey hadii aad reerkiina aadayso waa gar lakin hadii aad doonayso inaad nin reerod halkaa u marto waa wax aanan anigu yeelayn asmacayna ee waxad samaysa gurigaaga joog meel aad u bixi kartaana yaanay jirin Sagaleey waa hadii aad ubad keena iyo wada noolaansheheena qiimaynayso.

# SAGAL IYO SAKARIYE

Sagal waa qof meeli u muuqdee waa qaylisay oo ku tidhi isba maanta waa ii samayn lahaa hadii aad ku jiri tuu ku jiro. Wuxuna ugu jawaabay anigu gorgortan kugulama gelayee rerkaaga dhoqo wallaaley hadii aad wax iga maqlayso hadii kalena waa wax adiga kuu yaal hadii aad kaabada guriga dhaafto.

Sagal umaysan joojine waxay soo qabsaday wiilkeedii iyo inantii dii yarayd waxayna soo aaday garoonka diyaaradaha si toos ahna waxay u soo wajahday Dalkii intii ay hawada kusoo jirtay ayaa ninkii qabayna la’a hadlay reerkoodii una sheegay sagal waxa ay samaysay iyo inay gurigeedii usoo dumisay wiil yar oo meel ku xanuunsanaya. Odaygii Sagal Aabeheedna waxa laga waayey hadal aan cadho ahayn wuxuuna yidhi ma iyadaa sidaa samaysay oo ma Sagal baa waxas ku dhaqaaqday adigu aniga ayaa shuqulkeeda aqaanee iidaa waxas waxa ugu wacan waa hooyadeed oo baarka u siidayseye. Sagal Aabehed ayaa waxa uu kusii sugayba garoonkii diyaaradaha ee ay ka soo degeysey wuxuuna ku boobay Su’aalo iyo canaan aad u kulul isaga oo ku yidhi waxad tahay ma xishooto aan xayo lagu ogayn wiil yar oo aydaan isku sinji iyo cid ahayn baad reerkaga u burburinaysaa. Sagal ayaa la murantay odaygii isaguna cadhadii waxba ma hubsane intuu qabtay ayuu garaacay wiilkii iyo Inantii yaraydna kasoo qaatay iyadiina kaga yimid bartii uu ku garaacay.

## KULANKII SAGAL IYO SAKARIYE

# SAGAL IYO SAKARIYE

Sagal bartii bay baroor la fadhiisatay oo iska oydey oo ay Taxi u yeedhatay iyada oo meel kasta uu ka burburiyey Aabeheed. Waxay uga dabatimid gurigii waxana hadana markii uu arkay laga qaban kari waayey odaygii balanna ku qaaday inay wiilkaa aragto iska daaye xitaa inaysan guriga dhaafi doonin oo Qol halkan ah intuu ku riday qafilna dusha kaga jabshay yidhina bal waa qofka ka fura ee illahay nafta geliyey baan isku naalaa oo intii wiilkii iyo Inantii yarayd islaantii u dhiibay yidhi sidaad u gelayso waa mid adiga kuu taala ama isku dhig ama caano u doon annaga ayaad ciyaal yar yar nagu kibrisaa oo aad intaa leedahay iska daa ciyaalka gabadhay yar ee kibirtay ama anaa aduunka ku noolaan ama iyada ku noolaan oo anaa ka tegaya dunidan ama sida aan doonayo ayey noqonaysaa hadii.
Sagal walalkeed oo aan waxba war ka hayn ayaa gurigii iska yimid mise wuxu arkay gurigii oo buuq iyo qaylo ka taagan tahay iyo qof dumaroo barooranaya oo Qol ku xidhan markaa ayuu yidhi meesha maxaa ka khaldan waa maxay baroortaniyo qayladan guriga haysatana markaa ayaa hooyadii ku tidhi war waa walaashaa Sagal oo odaygii reerku dilay markii uu dilayna bartaa ayuu ku xidhay. Oo maxaa dhacay Sagalna maxaa meeshan keenay debeda ayaanba ku ogaaye.

Kedibna islaantii ayaa u warantay tidhina hooyo Sagal waxay ogaatay in wiilkii Sakariye nool yahay sidoo kalena uu ku xidhan yahay magaalada isaga oo waalan sidaa laa jigeed ayey u timid magaalada si ay u aragto xaalka uu ku jiro Sakariye. Wuxuu ku

hadlo intuu garan waayey ayuu yidhi oo miyey waalan tahay iyada hada miyaan nin qabin mida kale meeyey odaygeediina. Hooyo muusan soo raacin oo wuuba ka cadhooday isagana odayga la soo hadlay una sheegay sida wax u jiraan iyo Sagal meesha ay ku socoto.
Haa oo hooyo inanta markaa maxaa si degan loola hadli waayey inta la dilayee xoog lagu maquuninayo maa caadi wax loogu sheego mida kale hadii ay soo eegto dee macnaheedu mahan inay guursanayso wiilkee xaalkiisa uunbay soo eegaysaa soo mahan.
Islaantii baa soo boodoo tidhi war naga aamus waxba ku hadli mayside ma naag laqabo ayaad leedahay nin waalan oo meel ku xidh xidhan hasoo eegto haduu kufsado ama uu dilo yaa qaba ma adiga ayaa aabahaa ka garbaxaya wiilow. War dhulka in ku leeg fadhiiso hooy oo aabahaana hayska hor imaanina hadii aad illlahay nabad ka doonayso intii uu cadhooday ayuu ka dhaqaaqay yidhina hooyo adiyo Aabe waxad moodaa inaad isku duriyad tihiin oo dhoobadiina meel laga wada qaaday dee maxan  ula yaabayaa idinba waxad isku guursateen jacayl ma ahayne waa layskiin siiyey awel soo ma ahayn.

Islaantii intay xanaaqday oo ay gubatay ayey tidhi war wasakhyahow mar danbe aniga haygu odhan waxas hana igu soo war celin yaa kugu yidhi waalidkaaba waxas lagula hadlaa Wax ma xishoode ah baad tahay waan ogaa in waxaasi kaasoo socdaan beryahanba.

# SAGAL IYO SAKARIYE

Ahmed waa Sagal wallaalkeede wax uu sameeyo waa garan waayey, Sagal oo meeshii ka ooyeysa ayuu daaqada kala hadlay waana ay ku muusanawday kuna tidhi wallow hadii aan wada dhalanay icaawi oo Meesha si uun iiga saar.

Wiilkii go'aan buu gaadhay in uu hadaba Sagal meesha ka saaro oo uu arko xaalkeedana. Odaygii Aabihiina waxa uu ka soo laabtay magaalada oo gurigii ayuu ku soo noqday isaga oo sidii u kacsan cadho darted. Wiilkii waxba kuma oran Aabihiise inta uu iska aamusay oo uu sidaa u eegay ayuu suuqiisa iska aaday lakin qorshe ayuu damacsanaa.

Dhanka kale Sakariye waa iska sidii oo waa qof Qol cidla ah iskaga xidhan subixiina Ciraaj baa la geeyaa gelinka danbena waxa lagu xidhaa Qolka waa qof intaa uun dhexeeya mana hadal badna marka laga reebo Sagal oo uu marna quruxdeeda amaanayo marna uu u heesayo lakin dadkoodhan waa ku murugo oo waxay intaa iska ciil kaanbiyaan wiilkooda naagtu sidaa u gashay ee iyana iska nool oo nolol sare iskaga jirta. Sakariyese waa nin iska xanuunsanayee in waxaasi u baxaanba maahan oo isaga waxa u daaran cajeeladii jacaylkiisa oo wax aan inantaa ahayna maba marayaan.

Sagal iyana waxay iskaga xidhan tahay Qolkii aabeheed ku riday oo halkaa ayey ka caalaacalaysaa lakin Aabeheed mid

waxas u joojinaya mahan dhanka kalena ninkii qabay ayaa isna markaa kasoo daba baxay soona aaday dhankaa iyo wadankii bal si uusan u noqon qof mar moog ah oo aan waxba markaa war u hayn. Xaga kalena Sagal walalkeed ayaa waxa uu qor shaynayaa in uu istuso Sagal iyo Sakariye lakin waxa uu wadaa waa qorshe dheer oo ah in aan iyada oo aan cidi ogayn in uu kexeeyo unna geeyo meesha Sakariye ku jiro.

Wiilkii qabay Sagal waa yimid waxana laga soo kexeeyey garaanka diyaaradaha markii loo keenay Sagal uuna arkay xaalka Sagal iyo waxa ay ku sugan tahay waxa hayaana uu jacayl run ah yahay ayuu ku yidhi Aabe waxan rabaa in aan la hadlo Sagal oo aan waraysto bal waxa ay ka damacsan tahay reerkeeda iyo sida ay wax u rabto wuxuu odaygii ugu jawaabay hawraarsan adero anaa kuusii daynayee goorma ayaan kuu furaa. Waxana uu yidhi Adero hadii ay macquul tahay hadaba. Waa u furay odaygii qolkii Sagal isla markaana waxa dhex martay sheeko gaabay Sagal iyo odaygeedii waxayna ahayd sidan:

Sagaleey waan arkaa xaalkaagu meesha uu taagan yahaye waxad iiga war bixisaa sida aad wax u rabto ileen naag marwo ah oo la qabaad tahaye mida kale waxad iiga war bixisaa maxad ka damacsan tahay qoyskii aan dhisnay ee aan weliba ku tacabnay iyo weliba ubad keena.

# SAGAL IYO SAKARIYE

Sagal waxa ay ku jawaabtay markii ay cabaar aamusnayd ka bacdi.
Walaalow waan ogahay in aan reer wada aas aasnay kuna noolayn nolosha ta ugu quruxda badan lakin aduunka ayaa kala fogooyey labada isku haboonba adiguna waad ogayd jacaylka aan u qabay Sakariye iyo sida aan ugu naaloonayey jacaylkiisa ilaa iyo intii ay wax nagu kala dheceen se hal yar aan ku su'aale hadii aad adigu maanta wax jeclaan lahayd maxad ku dhaqaaqi lahayd ama markaa aad isku deyi lahayd inaad samayso weliba adiga oo reer leh.

Wuxu ugu hal celiyey horta wax kasta waa amarka eebe lakin mid adigu Sagaleey haka tegin anigu nin baan ahayd oo waxan guursan karaa mid iyo lababa lakin adigu gabadh baad tahay oo waxad guursan kartaa oo keliya waa hal. Taasi waa mid mida kalena waa in aad tahay wakhti xaadirkan inan la qabo oo weliba hor fadhida ninkeedii waxaase ii siiraacda waa in aad meesha ubad joogo oo aan labadeenuba nahay Aabe iyo Hooyo. Hadana ma ahhi nin maanta taagan oo ku leh aniga ayaa ku qaba oo waxad samaynaysaa wixii aan kudhoho yeel lakin adiga hadan talada kuu dhiibo maxad damacsan tahay sideese wax u rabtaa adiga oo kala saaraya mar xalada meesha taala kuna xisaabtamaya waxa meesha yaal.

Sagal waxa ay ku jawaabtay waxan rabaa inaad marka hore iga raali noqoto allah hakaa raali noqdee

# SAGAL IYO SAKARIYE

Waxana rabaa in aad wax yaaba aan wato aadan igu diidin ama aadan markaa igu colaadin waxan ahay anigu qof caashaq wato kuna sugan maanta mar xaalad ka duwan mar xaladaha kale ee bili-aadanku maro marka wallaal adiga oo aan igu xumaynayn ama markaa aan i cadaadinayn in aad iska kay fasaxdo hadii aan doono aan cidla ku dhecee aniyo ubadkaagana sidaa nagu ogaato ahaatana in aan col iyo cadho aan igaga tegin anigoo og weli in marxaladaasi tahay mid ka duwan kuwa kale laakiin abaal baan kaaga hayn doonaa hadii aad taas ii yeesho Waxaadna noqon doontaa qof weligey in aan waxsan ku dhoho mooyaane aan wax xun u quudhi doonin sidoo kalena in aan aduuniyo akhiraba kuugu duceeyo wixii aad jeclaato in illahay kaaga dhigin sida mar xaladaydu noqotay oo kale.

Wiilkii waa aamusan wuxuu ku hadlana waa garan wayey oo wuxu noqday nin ay shaqo adagi haysato wuxuu go'aan ku qaatana waa garan waayey caabaar buuna aamusnaa lakin waa u jawaabay wuxuuna ku yidhi diyaar Sagaleey waan ku furayaa waxana kugu furayaa wixii aad jeceshahay. Waxana kuu rajaynayaa in aad hesho waxa sidaa oo dhan noloshaada u saameeyey midna ha hil maamin waxad tahay ubad kayga hooyadoode wax kasta oo aan kugu caawin karo waxan kuula ahayd diyaar oo mar kasta oo aad caawimo u baahato waxan kuu ahay qof diyaar ah.

# SAGAL IYO SAKARIYE

Sagal waxay ugu jawaabtay waxan rajaynayaa in allah ku solon siiyo wax kasta oo aduunka u khayr badan iyo naag kuu jeclaata sida aan u jecelahay Sakariye oo kale sidoo kale waxad tahay qofkii noloshayda ugu qaalisanaa ee aan arko ama aan la kulmo mudadii yarayd ee aan kula noolaana nolosha waxad iga barta sayga wanaagsani sida uu u daryeelo reerkiisa gar iyo garashaba Allah waa ku siiyee Illaahay hakuu siyaadiyo. Abaalkaguna wuxu igu ahaan doonaa xujo iyo mid aan in badan ku qoro qalbiyada Laabtayda Si aanan weligaa wixii aad ii yeeshay aanan u ilaawin.

Wuxu kugu jawaabay wax dhiba malahan asxaankuna waa wax jira adigana waxan kuu rajayn in Allah ku waafajiyo wixii san ee aan shar lahayn guul iyo nolol fiicanna waan kuu rajaynayaa. Wuuna ka baxay isaga oo markaa ku yidhi waan kuu maqanahay ee ha moodin in aan sidaa kaaga tegey.

Wiilkii wuxu u tegey sidii uu u sii socday odaygii wuxuuna ku yidhi adero inantii waan wada sheekaysanay waxbadan aanu wada kaftamayney ama aan wada sheekaysaneyeyna waxan isku af garanay in aan isku raacno wixii iyada u san ama qalbigeedu doonayo mida kale Adero ha hilmaamin qofku nolol kasta oo uu galo hadii uusan ku faraxsanahayn waxba uma soo kordhiso si kastoo ay u qurux badan tahay markaa adero hana iga xumaan ee Sagal waan furayaa waxayna igaga furan tahay maanta laga bilaabo hal dalqad.

# SAGAL IYO SAKARIYE

Odaygii waa madoobaaday oo cadhooday oo intii aamusay oo wuxuu ku hadlo garan waayey ayuu sidaa u eegay oo yidhi adero hada maxad igula hadashay mida kale waa maxay waxan aad inanta yar la qaadatay oo aad iigu sheekaynayso adero miyad xanuunsan sidee wax kaa yihiin. Mida kale wuxu waa qof dumaree ma qof amarkiisa lagu sii daayaa anigu waan iska ogahay oo iyada aya kaa dalbatay kuguna tidhi waxas yeel adiguna nin iska qabow baad tahay adero ku noqo inanta berina duula oo ku laabto bartii aad ka timaadeen adero hadeerna anaa iyada la soo hadlaya oo runta u sheegaya way kibirtay inanta yari oo wax wax u sheega ayey la'adahaye.

Wiilkii ayaa ugu jawaabay adero may may ha samayn go'aankaa waan wada qadanay adero mida kale ha hilmaamin inantu maanta waa qof wayn qof la Khasbi karana mahan mida kale maanta qofka la khasbaa adero aduunka wuxu ku dhamaysan xumaan iyo xanuun markaa adero waan ku baryeyaaye inantaada u naxariiso oo hayskugu darin laba aan is qaadanayn hays kuna day in aad wiilka iyo inanta aad adigu isla raadiso intii aad beri ka maalin inantaa nolosheeda aad aduunka ka baadi goobi lahayd waa iga tallo adero wax kastoo la sheegana anigu ku noqosho wallay iga tahay.

Odaygii waa madoobaaday oo cadhooday oo wuxuu ku hadluu garan waayey wuxuna ugu jawaabay Ader waxan ku moodayey

qof intan sii dhaafsiisane waxay inanta yar ee ka caqli badisay, Aad baan kuu salaamayaa Ader sida aan ugu talinayaana waa mid aniga ii taale
oo waaba mid adiga hada kaa xil wareegtay markaa arintaa adigu iskaga hadh. Kana dhaqaaqay isaga oo aan wax sani wejigiisa ka muuqan cadhona hadhaysay dhaaamtii oo dhanba.

Wiilkii isaguna waa iskaga tegay wuxuuna u diyaar garoobay in uu inantana warqadeedii u qoro isaguna uu ku laabto dalkii uu ka yimid. Wuxuuna la hadlay Sagal hooyadeed una sheegay inta arintu si uun noqonayso inay labada ciyaala Hooyiyo Aabeba iyadu u tahay wixii soo kordhana ay la soo socodsiiso. Sidaas ayuuna ugu laabtay dalkii uu ka yimid.

Dhanka kale Sagal walalkeedna waxa uu qorshaynayaa qaabkii uu isugu gayn lahaa Sagal iyo Sakariye oo qorshe ayuu samaystay uuna doonayo inay labadeeduba isku arkaan bal ninkan waalani inuu caadi noqdo darteed. Waxa uu sameeyey waxa uu soo ka xastay laba wiil oo ay saaxiibo yihiin waxanuna ku yidhi waxad ila jebisaan qolka ay walashay ku xidhan tahay caawa iyada oo aan qofna maqal. Sidoo kale waxa uu u diray Sakariye wiil ay ilmaadeer yihiin isna wuxu ku yidhi yeel sidaa aan yeealayno oo kale oo waxad samaysaa soo kexee Sakariye.

# SAGAL IYO SAKARIYE

Qorshihii oo sidii sii u diyaarsan ayaa lagu wada dhaqaaqay mid kastaana dhiniciisa ayuu ka galay hawsha. Waxana markiiba Qolkii Sagal jabsaday wiillashii iyo walalkeed waxana laga soo saaray Sagal isla markiibana waxa loo dhaqaaqay meeshii lagu balamay in lagu kulmo oo ahayd meel magaalada qoorigeeda ah markiibana waxa meeshii hor tegey Sagal iyo wiilashii oo cabaar ayey sugayeen waxana markiiba Sagal tidhi war hada xagee lay wadaa walalkeed ayaana ku yidhi waxa aad noloshaada oo dhan u baabi'iisay soo mahan jacaylka aad Sakariye u qabto hadaba caawa ayaan kala xaqiiqsanaynaa marka uu ku arko sida uu noqdo iyo in uu caadi noqdo ileen waalida haysaa waa adiga ayaa la leeyahay mida kale wixii aan ku dhohona yeel.

Haye bay ugu jawaabtay laakiin anigaa wax rabee may yeelaysaa walalow wuxuna ugu jawaabay oo ah waxayna ku tidhi waxad i geysaan meeshii aan Sakariye ku kulmi jirnay si uu labada meeloodba iskugu aqoonsado wuxuuna kugu jawaabay meeshu sidii aad mooday mahan oo hada mudo dheer waa abaar mida kale dhulku iska bahala galeen buu noqdayoo meel la aamini karo hadan xiligan habeenimada ah mahan markaa iska daa haduu wax aqoon sanayo adiga haku aqoon sadee waana ay diiday oo ku tidhi intii kaleba ii yeeshaye walalow intaa ii yeel bes. Haye buu yidhi kedibna waxa uu la hadlay wiilashii kuna yidhi qorsheheenii waxbaa iska bedeley waxanuna aadaynaa xagaa iyo dhanka kale ee magaalada

wiilashiina waxay ugu jawaabeen anagu adiga ayaa na wada meeshii aad caawa noo ka xaysana waan kuu raacayna. Waxana u jahaysteen halkii iyo meeshii ay horaantoodii isku barteen, mudo markii ay ka soo wareegtay meeshii waxa ku horeeyey wiilshasii oo wada Sakariye waxayna ku sugayeen meeshii cabaar waxana u yimid Sagal iyo wiilashii. Dhanka kale waxa ogaaday in ay Sagal baxday Odaygii Aabeheed ahaa aad buuna u cadhooday isaga oo markaa wacad ku maray in uu meel saari doono inantaa yaree kibirtay waxanuna usoo baxay xagaa iyo xaafadii Sakariye isaga oo markaa ka raadinaya Sagal Meesha ay aaday kuna tuhmaya inay Sagal soo aaday Xagaa iyo Sakariye. Dhanka kale waxa ugu danbayn lays hor keenay Sagal iyo wiilkii Sakariye ahaa waxayna noqotay wax la yaableh. Wiilkii Sakariye ahaa waxay kaga dhegtay allah ma Sagal baa mise waa ishayda. Halkaas oo Sagalna ugu jawaabtay waa farxadaydiiyow waa Sagashii aad jecelayd oo kuu soo laabtay wiilkii buuqii yaa ka baxay waxaana hal mar si lama filaana ah isku bedelay qof caadi ah oo dadka la sheekaysanaya waydiinayana sida ay Sagal ku soo heleen iyo sida ay mar xaladani hada ku timid waxana la hadlay wiilkii Sagal la dhashay waxanuna ku yidhi aniga tallo hadii aad iga maqlaysaan wixii aan idiin qaban karayey waan idiin qabtay. Ee Meesha inta aad awoodaan ka taga oo meeshii aad jeceshihiin isla aada oo halmar lee isla kaaya dhaafa.

# SAGAL IYO SAKARIYE

Halkiibaa lagu wada sheekaystay Sagal iyo Sakariye iyada oo waayihii tagey iyo xaalkii mid waliba mid ka kale uu u maray uga sheekaynaya waxana halkaa ku midoobay laba aad isku jecelaa noloshoodana wax badan khatar u geliyey sidii ay isku heli lahaayeen waxayna go'aan sadeen inay meel labadoodu isku wada raacaan iyada oo markaana sii ka xaysanaysa ubadka ay dhashay. Waa laysku af gartay laakiin Su'aasha ayaa ahayd xagee ayaan aadaynaa maadaaba wakhti xaadirkan ay ina raadinayaan waalidiinteen waxana laysku afgartay wixii la rog rogaba in xagaa iyo **Kenya** la'aado oo halkaa nolol cusub laga bilaabo. Sidaa ayaana laysku afgartay waxana la go'aan saday in la boxo marka ay arimohoodu iskugu toos toosaan waxana aad ugala qayb qaatay wiilashii dhalin yarada ahaa iyaga oo la dadaalay waxana markiiba loo dhaqaaqay sidii loo hawl gelilahaa waxana la qayb saday hawshii qof kastaana waxbaa loo diray wallow arinta la qabanayey aysan ahayd hawl weyn keliya waxa ugu wayni waxay ahayd sidii labadoodu Meesha uga wada bixi lahaayeen iyada oo aan cidina fahmin Meesha ay u socdaan iyo waxa ay damacsan yihiin waxana la isku af gartay in labadoodu mid walibaaba uu ku laabto xaafadii qof kasaana uu iska sii dhigo siduu uu ahaa is aan loo fahmin. Habeenkaana sidaa ayaa lagu kala hoyday….

Meesha lakin dhibku ka dhacay ayaa ahayd markii Sagal Aabeheed uu aaday gurigii uu deganaa Sakariye oo uu

weydiiyey inay inantiisii arkeen kedibna lawaaayey Sakariyena halkaana waxa markiiba ka dhashay Shaki aad u weyn oo ka dhigay in ay wax jiraan maadaama labadoodiiba maqan yihiin odaygiina dib ayuu usoo noqday wuxuuna yimid gurigii isaga oo aad cadho uga muuqato waxana markiiba uu isha saaray Sagal oo halkaa soo fadhida iyo walalkeed oo agtaagan waana uu canaantay ilaa uu gadhay in uu dhirbaaxo inanta wiilka ayaana ku yidhi ee Aabe is deji inanta aniga kaxeeyey oo waxan u saaray suuqa bal inay wax fahanto waxana ka dhaadhicinayey noloshay manta haysato iyo sida ay u diidan tahay nolosheeda isla markana aysan u dareen sanayn waxa ka lumaya hadii ay isku daydo inay qubto nolosheedii hore waana is fahanay waxayna iskaga noqon doontaa meesheedii ay ka timid kana yeeli mayno inay nolosheeda daadiso ayuu kuyidhi odaygiina intii yaabay buu yidhi naa wiilku waxa uu sheegayo maxaa ka jirana?

Waxayna kugu jawaabtay haa Aabe waan go'aan saday in aan iska laabto noloshaydiina iskaga noqdo iyo dhulkii aan ku noolaa odaygii waa aaminay hadalkaa wuxuuna is tusayba in inantiisii wax kala garatay hadal kalena muusa sii dhaadine wuxu yidhi waan kuu duceeyey Aabe waana dareen Sanaa in aad ahayd innan caqli badane ee shaydaan baa ku hayey waxan u malaynayaana waxa laguu aqbay ducadii aan habeeniyo maalin kuu akhrin jiray. Ee hadana Aabe orad iska seexo waa habeen badhe beri baynu si wacan u sheehaysane.

# SAGAL IYO SAKARIYE

Dhanka kalena wiilkii Sakariye waxa uu iska si watay qorshihiisii wuxuuna sii metalayey waa lidiisii. Mudo markii arinta lagu dhex jiray oo habeen walba telefanka layska hadlayey waxa lasoo gaadhay xiligii bixitaanka iyo gaba gabadii beentii la jilayey waxana la go'aan saday in arintaa beri lagu dhaqaaqo oo gaadhi ingaydh ah la raaco ilaa iyo Garoowe markaana diyaarad looga sii raaco xagaa iyo Xamar oo markaa laga dhamaysanayo wax yaaba yar yar ee ka dhiman. Sidaa ayaana balantu ahayd waxana lasoo gaadhay subixii la bixilahaa qorshihii intii aan lagu dhaqaaqin waxa hor istaagtay oo tidhi kadaaya Sakariye walaashii una sheegtay in ay habeen baxaan maadaama maalintii la tebayo ama la ogaanayo oo aysan markaa meel fog gaadhayn. Waxana la yidhi waa runteed aan ka dhigano arintaa goor habeen ah waxana loo bedelay Habeen danbe. Gaadhina waa lasoo diyaarsaday markaa u baxaya xagaa iyo Garoowe. Isla habeenkii danbena waxa u yimid gaadhigii waxana laysku macasalaameyey halkaa iyada oo asxaabtii iyo walaalihii hawsha la waday halkaa lagu macasalaameeyey.

Isla habeenkiiba waxa ay galeen Garoowe waxana ku laasteen habeenkoodii intii ka dhinnayd isla subixiina waxa la guda galay in Xamar loo duulo. Waxayna soo goosteen tigid galabnimo baxaya oo aadaya Xamar kii ayaana la goostay maalintiina waxa laga soo adeegtay Garoowe dhexdeeda maadaama ay markaa iyadu xoogaa jeeb buurnaydna iyada ayaa inta badan

wax diberaysey. Intii ay qorshaha adeegaysiga iskaga jiraan waxa la soo hadlay labadii xaafadoodba weliba haw darnaadee odaygii Sagal Aabeheed isaga oo markaa ku canaanalaya waxa ay samaysay iyo sida ay wax yeeshay sidoo kalena aad u habaaramaya waxaanuna uu ku yidhi dayro ayaad iga tahay. Lakin dhanka Sakariye xaafadii waa la soo hadashay waxayna ku dheheen inanka yagoow waxaa farxad noogu filan in aad caafimaaday maantana aad mustaqbalkaagii gacantaada ku qaadatay mar kasta nalasoo hadal waanuna idiin ducaynaynaa in meel kasta Illahay idiin fududeeyo dadkiinana hooyiyo Aabe idiinka dhigo iyaga oo welibana dardaaran ku sii daray oo leh inantaa si gaar ah u ogow waayo waxay kaaga soo go'aday nolol wixii ay lahayd oo dhan waxayna aamintay oo ka dooratay adiga noloshaada marka sidaa ay kuu dooratay adiguna u darejee Illahay hadin wada darajeeyee. Waxayna dardaarankaasi u noqday shiidaal ay inta dhiman kaga gudbi karaan.
Amin amin Ayaana lagu kala tegay waxana laysku yidhi waa labadoodiiye ducadaasi dhulka inooga dhicimaysee safarkena aan sii wadano.
Waxa loo soo jahaystay xagaa iyo Caasimadi Somaliya. Waxana halkaa la joogay dhawr caana maal. Intii uu dhamaanayey fisihu ay ku aadi lahaayeen xagaa iyo Kenya wuxuuna ugu dhamaaday dhakhso maadaama ay iyadu sidatay dhalasho Amerikan ah. Waxana ay ka degeen halkaa iyo Kenya.

# SAGAL IYO SAKARIYE

## NOLOSHII KENYA

Kenya markii ay yimaadeen waxay mareen sidii caadada ahayd sharciga islaamka si laysugu meheriyo waxaana arintaa dhameeyey culimo iyo wiilkii Ahmed ee Sagal la dhashay. Sidoo kalena Qoyskii Sakariye dhamaan waa ka qayb qaateen wixii shuruudo ahaa ee markaa laga rabay Sakariye.
Meherkoodii ka bacdina waxa u bilaabatay noloshoodii Kenya.

Kenya waxa ay ka billowdeen nolol cusub waxana la bilaabay in markaa qof kastaaba dunidan wax ka soo dhacsado oo uu shaqaysto waxana markiiba shaqo iska wanaagsan heshay Sagal maadama ay markaa iyadu wadato Sharci Amerikan ah. Noloshiina waa la qabsadeen iyaga oo markaa meeshii asxaab badana ku bartay waxayna galeen Jawi iska degan.

Manta Sagal iyo Sakariye waxay ku nool yihiin wadanka aynu deriska nahay ee Keyna waxayna isku dhaleen 5 caruura marka lagu daro 2 ay u dhashay ninkii hore waxay haysataa 7 caruur ah sidoo kalena arintii qoyska Sagalna waa la xaliyey oo odaygii Aabeheedna waa la dejiyey waana uu iska cafiyey sanadkiina marbay waxay u duulaan dhulkeenii Hooyo.

Sagal waxay noqotay Ganacsato ka shaqaysa shirkadaha dharka soo saara, khaasatan kuwa wadanka Chinaha ka keena

dharka kala duwan.

Sakariye waxa uu noqoday isaguna wiil u shegeeya qolo Shirkadda ah wuxuuna ka qaataa lacag roon.

Reer kaasina manta waxay ku nool yihiin nolol aad u heer saraysa oo farxad iyo is jacaylba ku dheehen yahay.

### *Fiiro Gaar ah*

Labadan ruux magacyadooda saxda ah mahan ***Sagal** iyo* ***Sakariye**.* Ee annaga ayaa u qaadanay magacyo kale maadaama ay diidanaayeen in kuwooda saxda ah la sheego ama markaa laysticmaalo sidaa laa jigeed magacyada saxda ah kuwan maahan.